# Hagaha Wehelka



## Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore:

### Daryeelka Carruurta Qoyska

Mashruucan waxaa la suurta geliyey iyadoo la adeegsanayo maaliyad federaali ah, 93.434 - ESSA Deeqda Horumarinta Preschool Preschool-ka Dhalashada illaa Shan (Development Grants Birth through Five). Waxyaabaha ku jira waxaa mas'uuliyadooda leh qorayaasha mana matalaan aragtida rasmiga ah ee Xafiiska Daryeelka Caruurta, Maamulka Caruurta iyo Qoysaska, ama Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maraykanka.

Hagaha wehelku waxa uu isku darayaa fikradaha muhiimka ah ee laga helo qaab dhismeedka oo wata talooyin iyo tusaalooyinka sida ay u ekaan karto goobta caruurnimada hore. Waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo dadka la shaqeeya carruurta yaryar inay fahmaan bilowga waxa la samaynayo. Hagahan wehelku ma beddelayo qaab-dhismeedka asalka ah, laakiin wuu taageerayaa.

Boggan waa loo qasday in uu banaanaado.

# Hagaha wehelka ee Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore:

## Daryeelka Carruurta Qoyska

Dukumeentigani waa hagaha wehelka ee daabacaadda *Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee Minnesota ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: Daryeelka Carruurta Qoyska*. Dukumeentigaas waxaa laga heli karaa bogga ilaha/khayraadka waxbarashada caruurnimada hore ee websaydka Waaxda Waxbarashada ee Minnesota.

MINNESOTA

## Waa maxay sababta loogu baahanyahay hagaha wehelka?

Qaabaynta Aqoonta iyo Kartida Xirfadaha ee Minnesota (Minnesota's Knowledge and Competency Framework) wuxuu caddeynayaa baahida waxyaabaha waxbarashada hore ee loo baahanyahay in la ogaado iyo la awoodo in la sameeeyo sidii si wax ku-oolnima ah loola shaqeeyn lahaa caruurta iyo qoysaskooda. Qaabka hagaha wehelka waxaa laga dhex helayaa aragtiyo muhiima oo ay wehliyaan talooyin iyo tusaalayaal ku saabsan waxaa uu noqon karo saldhigga daryeelka canugga qoyska. Waxaa looga danleeyahay in lagu caawiyo sidii bixiyeyaasha u heli lahaayeen faham bilow ah waxa ay qabanayaan. Hagaha Wehelkan ma baddalayo qaabkii asalka ahaa balse wuu kabayaa.

## Yaa loo qorayaa Hagaha Wehelka?

Haga-haan waxaa loogu talagalay qaangaadh kaste ee la shaqeeya caruurta qoysaska la siiyo daryeelka canugga. Macluumaadkaan ma wada koobayo dhammaan daryeel bixinta canugga qosyka ee loo baahanyahay in la ogaado; wuxuu si wayn u xoog saaraya, xirfadaha aasasiga iyo awoodo guulo lagu gaaro. Hagayaasha wehelku waxa kale oo heli kara xirfadlayaasha caruurnimada hore ee ka shaqeeya goobaha kooxda sida barnaamijyada iskuulka ku salaysan, xarumaha daryeelka carruurta, barnaamijyada Head Start, Montessori, iyo sidoo kale kuwa kale.

## Sidee loo barbar dhigayaa Hagaha Wehelka Dhallaanka-Socd-bardaka?

Hagaha Wehelka Dhallaanka – Socod-baradka ee Awoodaha Laf-dhabarka Mnnesota (Minnesota Core Competencies) waxaa la faafiyay 2022. Wuxuu xambaarsanyahay macluumaad aasaasiya oo muhiim ah looguna talagalay kuwa daryeelaya caruurta ee da'doodu tahay dhalaanka ah ilaa iyo saddex jir. Qalab ku habboon, kuwa la shaqaynaya caruurta da' kasta ay yihiin, iyadoo qasadka laga leeyahay uu yahay in qoraalkaan dib loo soo celiyo.

## Waxa ku saabsan habaynta qoraalkaan

Hagaha wehelka waxa loo qaybiyaa isla aagag la mid ah sida *Qaabdhismeedka Aqoonta iyo Kartida ee loogu talagalay Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore: Daryeelka Carruurta Qoyska*:

Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka ayaa lagu dhex daray dhammaan aagagga kartida.

I. Koritaanka Canugga iyo Barashada

II. Waaya-aragnimada Barashada Koritaanka habboon

III. Xiirirada ka Dhexeeya Qoysaska

IV. Qiimaynta, Qiyaasidda iyo keliyeelidda

V. Horumarinta Waxbarashada Caruurnimada Hore ee Taarikhiyan isku Xilli aha (Historical and Contemporary Development of Early Childhood Education)

VI. Mihnadnimada

VII. Caafimaadka, Ammaanka iyo Quudinta

VIII. Tijaabin Lagu Sameeyo Waayo Aragnimada

IX. Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada

X. La shaqaynta caruurta aan gaarin da'da iskuulka iyo qoysaskooda ee ku Hadla Luuqadaha Badan

Tobanka meelood waxaa kaloo loo si qaybinayaa waxyaabaha ay bixiyaashu tahay in ay ogaadaan iyo ku sameeyaan heer saldhig hoose. Qaybaha liista qaarkood ee tusaalooyinka aqoonta iyo xirfadaha laga filan karo bixiyaasha sida kolba ay u korinayaan iyo u helayaan waaya-aragnimada. Marxaladaha qaarkood, waxa aad heli kartaa sheyo dheeraada oo kugu reebi kara faham durugsan oo aad si gooniya ugu hanan karto hoggaamiyaasha xarunta shaqada. Hagaha Wehelka waxaa kaloo ku jira "Xogta uruursan ee goobta shaqada" ee ka caawinaysa sharrax xaadda aqoonta iyo xirfadaha looga baahanyahay bixinta tayada waaya-aragnimada barashada.

Dhammaadka qoraalka waxaa jira qaybo, ku saabsan "Ma doonaysaa barsho dheeraada" oo buugga ku jira, qodobo iyo baro internet oo ku siinaya ilo macluumaad dheeraada.

## Lix waxyaabood oo bixiye kasta ee xanaanaynta canugga laga doonayo inu yaqaanno:

### 1. In aan is naqaanno waa qayb ka mida waxbarashada caruurta.

Qaangaarrada oo idil, waxay leeyihiin shaqsiyad, waaya-aragnimo qoys iyo dhaqan iyo aqoon ku saabsan caruurta. Bixiyeyaasha waxay wax ku dhisaan waxa horay u ogaayeen iyo loo rumaysnaa sida kolba ay ugu kordhiyaan waaya-aragnimada iyo waxbarashada. Waxbarashada, waaya-aragnimada iyo is-dhexgalka qoysaska waxay ku keeni karaan caqabad qayimka iyo caqiidooyinka qaarkood. Wadashaqayn lala yeesho caruurta iyo qoysaskooda waxay keeni kartaa qiirooyin badan. Bixiyeyaashu waxay u baahanyihiin in ay muujiyaan dareenkooda, fal-celisyada iyo fiiro gaara u yeeshaan dareemada hoosta laga xariiqay kuwaaso go'aamiya sida macluumaadka duugga ah loogu xirayo kuwa cusub.

### 2. Xiriirada waa wadnaha waaya-aragnimada barashada hore

Xiriiradu dhib badan ayay ku yihiin la shaqayn macna leh oo lala yeesho kurayada caruurta iyo waalidiintooda. Bixiyeyaasha waxay dhisaan xiriiro lala sameeyo caruurta marka mid waliba uu garanayo waxa uu jecelyahay ama necebyahay, baahiyada iyo wax ka sheegga qofka. Bixiyaashu waxay abuuraan goobo soo dhoweyn halkaaso caruurta oo idil ay dareemaan in ay ka tirsanyihiin iyo ka bartaan soo dhoweynta iyo lagu daro midba mid kale. Marka qangaarku caruurta kula dhaqmo xushmad, waxay baranayaan in iyaguna is xurmeeyaan midba midka kale. Dhisidda xiriirada qoysaska dhexdooda waqti iyo qorshayn ayay qaadataa. Waa muhiim in la dhiso ka qaybgal dhab ah qoysaska dhexdooda; hal qof qoys kasta iyo lagu siiyo qiime xiririirka iyo is xaqdhowrka midba midka kale caqiidooyinkiisa iyo dhaqamada.

### 3. Caruurta oo idil waxay u baahaanyihiin ka qaybgalka jawi hodontinimo ku dheehantahay kaaso jir ahaan iyo qiiro ahaan xasilloon.

Barbaarinta iyo ka jawaabidda daryeeka iyo sidoo kale waxbarashada caruurta waxay ka caawinaysaa koritaan xasilloon iyo xiriiro kalsooni leh kuwasoo ka taageeraya sahminta iyo horumarinta. Bey'adaha xiisaha leh oo leh xudduudaha muuqda caruurta waxay ku caawinaysaa sahanka iyo barashada. Ku xirnaanta bey'adaha dabiiciga caruurta ee heerarka kartidooda oo idil iyo kuwa baahiyada gaarka qaba. Barbaarinta joogtada ah caruurta waxay ku caawinaysa dhismaha kalsoonida iyo madaxbannaanida, dhiirrigalinta ku xirnaanshaha iyo taageerada horumarinta barashad.

## 4. Caruurta kurayada waxay koriyaan nuxurka qoysaskooda, dhaqamada iyo bulshada/jaalliyadda.

Caruurta waxay bartaan indho-indhaynta dadka muhiimka u ah nolashooda. Dhaqanka guryaha qoysaskooda, caruurtu waxay fahmaan dareemada la muujiyo iyo sida iyo marka iyaga loo muujiyo, kartida dhaq-dhaqaaqa murqaha, sida ay wax u baranayaan iyo u socodsinayaan macluumaadka cusub iyo siyaabaha ay u isticmaalayaan ku hadalka luqadda, calaamadaha wajigooda lag dheehanayo, tilmaamaha gacmaha ama madaxa iyo hadal la'aanta ama aamuska. Jawaabaha dhaqanka waxay sharfaan aqoonsiga dhaqanka caruurta. Ka jawaabidda dhaqanka waxay karaamaysaa aqoonisga dhaqanka caruurta. Gebi ahan dhaqamada maalinla ah, is-dhexgalka, iyo waxyabha sida joogtada u dhaca. Bixiyaashu waa in ay dadaalladaas la sameeyaan qoysaska laga soo bilaabo dhaqamadii hore oo idil (ay ku jiraan kuwooda) sababtoo ah qoys kasta wuxuu u muujiyaa dhaqankiisa siyaabo gooni ah. Sidoo kale xiriirada caruurtu ay la leeyihiin kuwa kale saamayn ayay ku yeelanaysaa koritaankooda.

## 5. Caruurnimada hore waxay u dhigantaa xilliga koritaanka xawliga leh iyo horumarinta kaasoo aad muhiim ugu ah saldhigga caafimaad qabka aadaanaha.

Caruurta waa kuwo leh awood iyo sidoo kale nugul. Daryeelka ay caruurtu helayaan xilligan adag saamayn weyn ayuu ku reebi karaa sida ay dunida u arkayaan, marka la eego xiriirka ay dadka kale la leeyihiin iyo guulaysiga waxa ay baranayaan. Bixiyaashu waxay haystaan fursado kala gaara oo macna u samaynaysa nolosha caruurta kurayada iyo qoysaskooda. Caruurta la siiyo xannanada, daryeelka joogtada waxay u badantahay in ay soo koraan iyo noqdaan bulshaawi, caruur awooda in ay kuwa kale la saaxiibaan, muujiya is-xakamayn iyo jeclaada barashada. Koritaanka dib-u-dhaca keliya halis uma aha ama naafonnimada, balse wuxuu kaloo keeni karaa tiro qaracamo ama cadaadis la soo gudboonaada. Barbaarinta iyo daryeelka tixgalinta leh iyo waxbarashada la siiyo caruurta koriimadoodu ay halista ku jirto waxay ka caawin kartaa canugga koriimada iyo soo kabashada xirfadaha guusha dugsiga iyo nolasha uu ku gaarayo.

## 6. Kartiyo badan iyo xirfado ayaa wada koraya inta lagu jiro sanad yada hore ee canugga.

Horumarinta waa natiijo ka dhalata isdhexgalka fir-sidaha iyo waaya-aragnimada. Waaya-aragnimada iyo is-dhexgalladu waxay ku sameeyaan kala duwanaan koriimada hore ee maskaxda. Bixiyeyaashu waxay qaataan maalin kasta go'aamo badan oo ku saabsan sida iyo marka lala hadlayo caruurta, waaya-aragnimada la siinayo iyo marka caruurtu ay diyaar u yihiin in ay qaadaan tallaabo cusub oo la xariirta horumarkooda. Bixiyaasha og ee fahamsan waxa dhacaya inta lagu jiro xilligaas ee isbaddalka iyo koriimada waxay aad u diyaarsanyihiin in lagu tageero koritankooda. Macluumaad dheeradda ee la xariira koriimada hore ee maskaxda ka raadso Rugta Koritaanka Canugga.

---

Hagaha Wehelka Daryeelka Carruurta Qoyska ee Aqoonta iyo Qaabdhismeedka Kartida waxaa cusboonaysiiyay Carmen Cook (Kaaliye Barafesoor ee Barashada Carruurnimada Hore Metro State University) sanadka 2022 waxaana ku jira nuxurro ka tarjumaya waxyaabaha 2020 lagu soo daray darsiga qaabdhismeedka aqoonta iyo kartida.

# 2020 Mas'uuliyadda Hiddaha Dhaqanka iyo hab-dhaqanka

Baruhu waxa uu dhaqanka u arkaa muraayada ay carruurta iyo dadka waaweyni ku fahmaan ee ay kula xiriiraan adduunka iyaga oo garwaaqsanaya in ay iyaga masuuliyaddooda tahay in ay yaqaanaan muraayadooda dhaqanka ee ay iyagu wax ku arkaan iyo sidoo kale midda carruurta iyo qoysaska ku sugan goobtooda. Barayaashu waxay si u qasdaan hab dhaqankooda si ay u xaqiijiyaan oo ay xoojiyaan qiyamka dhaqameed ee dhammaan carruurta iyo qoysaska.

**Fikrad Muhiim ah: Dhammaan dhinacyada korriinku waxay ku salaysan yihiin dhaqanka wayna ku kala duwan yihiin dhaqamada iyo qoysaska dhexdooda.**

*Si ay u bixiyaan daryeel iyo waxbarasho tayo leh, barayaashu:*

- Waxay abuuraan bulsho ay carruurtu isku arkaan oo isu daneeyaan. Tusaale ahaan, faallo ka bixi marka carruurtu is caawiyaan ama soo dheji sawirrada carruurta oo isku dhinac ciyaaraysa ama wada ciyaaraysa.
- Waxay aqoonsadaan sawirada dhaqanka ee deegaanka caruurnimada hore, adiga oo u fiirsanaya kooxaha cid ka joogto ama kuwa aan cid matashaa joogin.
- Waxay ogsoonyihiin isticmaalkooda ereyada iyo sida aan u taageerno ama aynaan u taageerin habdhaqamada carruurta qaarkood.
- Waxay aqoonsanyihiin xirfadaha, kartida, iyo waxyaabaha ay ku fiican yihiin carruurtu kuwaas oo laga yaabo inay yihiin kuwo dhaqameed, sida marka ay munaasab tahay in la hadlo iyo in la dhegeysto, ama sida ay gudbiyaan baahidooda, u istaaga naftooda, daacadnimada ama iska leexinta in indhaha la isla helo.
- Waxay dhegaystaan rabitaanka qoyska shakhsi ahaaneed ee dhisitaanka aqoonsiga ilmahooda.
- Waxay aqoonsadaan saamaynta cunsuriyaddu ku leedahay korrIInka caruurta iyo guud ahaan caafimaadka.

*Marka ay barayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- U fiirso, si taxadar leh u dhegeysto, oo diiwaangeli waxa aad ku aragto ciyaarta carruurta iyo waxa aad ka maqasho qoysaska oo ka hadlaya; raac calaamadahooda marka aad dooranayso waxqabadyada, marka aad maaraynayso hawlaha caadiga ah, iyo marka aad ka wada hadlaysaan munaasabadaha iyo arrimaha bulshada.
- Waxay doortaan sawirro lid ku ah aaminsanaanta fikradaha qaldan waxayna ka tarjumaan waxyaabaha la iskaga midka yahay iyo kala duwanaanshaha koox kasta gudohooda iyo tan kooxaha dhexdooda (Derman-Sparks, 2010).
- Waxay hubiyaan in sawirada dhammaan qoysaska carruurta iyo noloshooda maalinlaha ahi ay ka muuqdaan deegaanka carruurnimada hore.
- Waxay doortaan buugaag iyo qalab kale oo ka tarjumaya dhammaan dhaqanka carruurta, luqadda, xaaladda dhaqan-dhaqaale iyo qaabdhismeedka qoyska.

- Waxay taageeraan wadahadalka iyo sheekaysiga ku saabsan sifooyinka carruurta iyo qoysaska (Derman-Sparks, 2010).
- Waxay ixtiraamaan oo dhiirigeliyaan kartida iyo xirfadaha carruurtu soo bandhigaan sida xirfadaha hadalka, isku-tiirsanaanta, wadaagista, ama in uu u idmo qof weyni kahor intaysan hadlin taas oo kala duwanaan karta caadooyinka dhaqanka.
- Waxay waydiiyaan qoysaska su'aalo ku saabsan waxa ay baraan iyo sida ay u baraan ilmahooda dhinacyada aqoonsigooda iyo kelmadaha guriga lagu isticmaalo si loo qeexo aqoonsiyadaas. (Derman-Sparks, 2010).
- Waxay ku dhiiri geliyaan ka wada hadalka dhaqanka, dareenka, waxay u muujiyaan naxariis iyo daryeelka dhammaan carruurta.

### *Marka ay barayaashu naqshadaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay dadka kale u sharaxaan sida korriinka ilmaha loo taageero marka deegaanka, hawlaha joogtada ah, iyo hawluhu ay ka tarjumayaan dookhyada dhaqameed. (Tusaale ahaan, dhaqamada qaar ayaa taageera bulsho ahaanshaha iyo wax wada qaybsiga iyaga oo quudinaya carruurta yaryar ilaa ay awoodaan in ay isticmaalaan maacuunta iyaga oo aan daadin; dhaqamada kalena waxay taageeraan madax-bannaanida iyo isku-kalsoonaanta iyaga oo carruurtu ay iyagu is quudiyaan laga bilaabo da' yar xataa haddii ay daadiyaan oo ay qasaan.)
- Waxay u noqdaan sidii buundo dhaqameed isku xirta kooxaha iyaga oo daadihinaya wada sheekaysi ixtiraam leh oo tusaalaynaya jawaabaha aan la yaabitaanka lahayn oo ay iyagu la yeeshaan qoysaska iyo qoysasku ay isla yeeshaan dhexdooda.
- Waxay deegaan la abuuraan dadka ay goobta ka wada shaqeeyaan, qoysaska iyo xubnaha bulshada si loo hubiyo in ay ku jirto in deegaanka iyo waxyaabaha laga filayo barnaamijka si habboon loogu metelo carruurta iyo xubnaha qoyska.
- Waxay u doodaan horumarinta xirfadeed ee daryeelka hore iyo waxbarashada xirfadlayaasha ee la xiriirta filashooyinka ku salaysan dhaqanka, hab ku salaysan waxyaabaha wanaagsan ee qoyska, horumarinta xirfadaha iyo kartida ku salaysan dhaqanka iyo barashada ka hortaga eexda.
- Waxay ku martiqaadaan ama martigeliyaan munaasabadaha qoyska halkaas oo qoysaska iyo xirfadlayaasha carruurnimada hore ay haystaan fursado ay ku wadaagaan macluumaadka si ay u bartaan waxyaabaha ay xiiseeyaan, caadooyinka iyo dhaqamada.

## Fikrad Muhiim ah: Qoysasku waa qayb muhiim ah oo ka mid ah korriinka dhaqanka waana in lagu qiimeeyo in ay yihiin hawlwadaag muhiim u ah waxbarashada carruurta.

### *Si ay u bixiyaan daryeel iyo waxbarasho tayo leh, barayaashu:*

- Waxay aqoonsadaan in fikradaha malaynta dhaqanka iyo eexaha, fahamka in malo-awaalka aan la qiranin (aaminsanaanta) ay sababi karto dhibaatooyin ama isku dhac.
- Waxay aqoonsanyihiin in qoysas badani ay leeyihiin dhaqamo isku dhaf ah oo leh qiyamka iyo caqiidooyinka soo jireenka ah iyo kuwa casriga ah. Dareenka ammaanka iyo isku kalsoonaanta carruurta ayaa si qoto dheer ugu dhex jira isu aqoonsanaanta togan ee ka mid ahaanshaha qoyskooda iyo dhaqankooda asalka ah.
- Waxay ogsoon yihiin oo ay dhiiri geliyaan isticmaalka luqada guriga.
- Waxay salaamaan oo ay taageero siiyaan xubnaha qoyska maalin kasta.
- Waxay aqoonsadaan muhiimadda iyo xooga ay leedahay qiyamka dhaqameed ee laga soo wareejiyo qoysaska loona wareejiyo carruurta.

### *Marka ay barayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Marka ay qoysasku ku weydiistaan inaad la qabsato hab nololeedkooda si aad u raacdo hab-dhaqankooda guriga, si xushmad leh u dhegayso oo la qabso marka ay suurtogal tahay. Tusaale ahaan, in aad raacdo dookhyada qoyska ee ku saabsan cuntooyinka fudud; ama, haddii qoysasku siiyaan masaasada kadib marka ilmahoodu hurdada ka soo toosaan (halkii ay ka siin lahaayeen hurdada ka hor), la qabso si aad u waafaqdo dookhooda.
- Kala hadal qoysaska sida ay wax u qabtaan guriga una adeegso macluumaadkaas si aad u dareensiiso ilmaha soo dhawayn iyo raaxo. Tusaale ahaan, weydii sida ilmahoodu uu jecel yahay in loo hayo ama loogu raaxeeyo; ogow oo bixi cuntooyinka, muuqa, ama sheekooyinka ay jecelyihiin. Haddii luqad aan Ingiriisi ahayn ay ku hadlaan, weyddii qoysaska inay ku baraan erayada afka hooyo ee inta badan la isticmaalo maalintii si ay carruurtu u maqlaan dhawr eray oo ay yaqaanaan.
- U fiirso xiisada u dhaxaysa qoysaska iyo barnaamijka marka aad taas dareento oo ka fiirso waxa ay sababuhu noqon karaan.
- Bixi jawi hodan ku ah akhris-qoraalka luqadaha ay ku hadlaan carruurta fasalka ku jirtaa.
- Waxay ka qayb-qaataan wada hadallada waxayna bixiyaan fursadaha in wax laga barto carruurta iyo qoysaska ku jira barnaamijka caruurnimada hore (tusaale, hawlaha qoyska, habeen qoyska).
- Waxay bixiyaan waxqabadyo ay carruurtu ku bartaan naftooda iyo kuwa kale iyada oo la adeegsanayo sahaminta qoyska (in la sameeyo buugga qoyska fasalka ama derbiga qoyska, in la qayb galo wada hadal ku saabsan xiriirada, waxyaabaha la iskaga midka yahay, waxyaabaha lagu kala duwan yahay, doorka xubnaha qoysku ka qaataan gudaha iyo dibadda guriga).
- Waxay ku soo daraan cuntooyinka, alaabta iyo sawirada carruurta iyo qoysaska ee muhiimka u ah ee matala dhaqamada qoysaska ku jira goobta carruurnimada hore.

### *Marka ay barayaashu naqshadaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay u fiirsadaan oo ka shaqeeyaan in ay meesha ka saaraan sinnaan la'aanta ama eexda ku jirta xeerarka barnaamijka iyo sidoo kale isdhexgalka maalinlaha ah ee carruurta iyo qoysaska.
- Waxay ka qayb-qaataan wada hadallada oo ay bixiyaan fursadaha in wax laga barto carruurta iyo qoysaska ku jira barnaamijka; waxay soo ogaadaan waxa ku habboon jadwalka qoyska, xiisaha, iyo goobaha (tusaale ahaan. wax qabadyada qoyska, habeenada qoyska, gudaha/bannaanka).
- Waxay bixiyaan isku xiraha dhaqanka/luqadda ee barnaamijka caruurnimada hore.
- Waxay siiyaan shaqaalaha carruurnimada hore fursado ay ku bartaan erayada ama kelmadaha muhiimka ah ee luqadaha ay ku hadlaan carruurta iyo qoysasku.
- Waxay ku martiqaadaan xubnaha qoyska inay ka qaybqaataan awoodaha go'aan samaynta ee barnaamijka caruurnimada hore.
- Waxay u abuuraan fursado xubnaha qoyska si ay isula wadaagaan waxyaabaha ay ku wanaagsan yihiin.

### *Sheekooyin ka yimid goobta:*



*Kay waxay u fiirsatay Mohammed wakhtiga cuntada fudud ee maalinlaha ah isaga oo fadhiya miiska laakiin aan cunaynin cuntadiisa fudud. Kay waxay weydiin "Ma gaajaysan tahay? Ma rabtaa cunto fudud?" Mohammed waxa uu u muuqday in uu ku wareersan yahay su'aalaha oo uu luxay madaxa "haa" laakiin uu sii waday in uuna cunin cuntadiisa fudud. Dhowr maalmood kadib, Kay waxa ay la hadashay hooyadiis, Kadra, oo ka warrantay hab-dhaqankooda quudinta ee guriga. Waxay u sharaxday in inta badan dhaqankooda hooyooyinku ay sii wadaan quudinta carruurta ilaa sannadaha da'da dugsiga ka horreeya. Kay waxay la wadaagay hab dhaqamada qofku in uu isagau wax cuno iyo in isagu adeegto ee dhaca xilliga cuntada fudud ee barnaamijka daryeelka carruurta qoyska. Si wada jir ah waxay ugu heshiiyeen qorshe lagu taageerayo Mohammed si uu u helo xirfadahaas xaaladaha bulshada iyo iskuulka dhexdooda iyadoo sidoo kalena la ixtiraamayo dhaqanka qoyska ee guriga labadoodaba. Kadra waxay la wadaagtay hab-dhaqameedkaa quudinta ee guriga. Kay waxay iskuulka ku qaaday tillaabooyin si ay uga caawiso diyaarinta cuntada fudud ee Mohammed oo uga caawiso quudinta iyadoo tilmaamo ka qaadanaysa Kadra iyo Mohammed si ay uga caawiso dhisidda kalsoonida wakhtiga cuntada fudud ee goobta daryeelka caruurta dhexdeeda.*

1

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay I: **Koritaanka Canugga iyo Barashada**

Caruurta waaya-aragnimadoda hore waxaa qaabaysa koritaanka maskaxdoda. Inkastoo caruurta guud ahaan ay u koraan siyaabo isku mida, canug kasta waaya-aragnimada noolashiisa khaaska (oo ah qayb ka mida qoyska, dhaqanka iyo beesha) taaso sababi karta habab aad u kala duwan ee barashada, hab-dhaqanka iyo miradhalka horumarinta.

## Fikradaha muhiimka: korrimadu waxay u dhacdaa qaabab la saadaalin karo hasayeeshe caruurtu waxay u koraan heerer kala gooniya

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Jeedaali iyo xurmee waxa canug kasta uu samayn karo.
- Waxay bartaan ilmo kasta dabeecadihiisa gaarka ah iyo shakhsiyadiisa.
- Waxay bartaan sida ay u badan tahay in ilma kastaa u muujiyo xiisaha uu u qabo wax cusub, sida uu u gudbiyo dareenkiisa iyo baahidiisa ugana jawaabo niyad jabka.
- Waxay ugu jawaabaan ilmo kasta siyaabo taageeraya aqoonsigooda, koriinkooda iyo horumarkooda.
- Waxay siiyaan carruurta agab iyo waxqabadyo iyaga caqabad ku ah laakiin la samayn karo.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Aqoonsanayaan in caruurtu mid kasta uu barto heerka qiyaastiisa.
- Jideenayaan hadafyo iyo qorsheyaal hawlagallo ka caawinaya canug kasta sida uu ku gaarayo tallaabada xigta.
- Hagaajinayaan sida uu uga falcelinayo canuggu la qabsiga isbaddalka kartida ku aaddan fahamka isdhexgalka iyo xog-isweydaarsiga.
- Ka caawinayaan canugga gaarista bartilmaameed go'an ee xaalad heerarka barashada hore ee loo yaqaan *Early Childhood Indicators of Progress (Tilmaamayaasha Horumarka Caruurnimada Hore)*.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Ka gudbayaan aqoon dhaafsan waaya-aragnimada barashada ay horumariyeen kuwa kale iyo abuuran waxqabadyo ku wajahan baahiyada gaarka ah ee canugga.
- Loo sharraxo kuwa kale waxa ay samayaan iyo sababta ay u sameeyaan.
- La fahmo heerarka gobolka xaaladda barashada hore iyo sida ay iyagu u adeegsanayaan.

1

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay soo koraan iyo bartaan iyago qayb ka ah, dhaqanka iyo bulshada qoysaskooda

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Waxay kala hadlaan xubnaha qoyska waxa ku saabsan sida guriga wax loogu sameynayo iyo loo isticmaalayo macluumaadkaas uu canuggu lagu dareensinayo soo dhoweynta. Tusaale ahaan, baro jadwalka caadiga ah ee qoysku isticmaalo wakhtiga hurdada oo isku day inaad sidoo kale isticmaasho.
- Waxay ku dhiirrigaliyaan caruurta in ay la wadaagaan sheekooyin nolol maalmeedka qoyskoda, sida hawlo ay qoysku xiiseeyaan ama xayawaannada dad-la-noolka.
- Waxay abuuraan dareen bulsho ay carruurtu isku arkaan oo isu daneeyaan.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Fahmayaan ahmiyadda iyo taageerada ay u leedahay luqadda looga hadlo guriga canugga iyado la xushmeynayo adeeggsiga luqadda guriga ee qoyska, laguna siiyo guriga qalabka luqadaha, sida buugagga, qalabka lagu ciyaaro (games) iyo muusikada iyo barashada erayada qaarkood ee heesaha laga qaado guriga canugga, sheekaysiga iyo waxyabaha sida joogtada loo sameeyo.
- Waxay siiyaan caruurta fursado ay ku bartaan dhaqammo kala duwan, caadooyinka, luqadaha iyo qaab-dhismeedka qoyska ee caruurta kale iyo qoysaska.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay dhisaan faham qoto dheer oo ku saabsan caadooyinka, qiyamka, korinta ilmaha, iyo filashooyinka dhaqamada kala duwan ee caruurta kooxda ku jira iyaga oo la hadlaya qoysaska kana qayb galaya munaasabadaha dhaqameed ee bulshada dhexdeeda.
- Waxay aqoonsadaan bulshada guud ahaan ay caruurtu ku noolyihiin iyo sida ay uga jawabayaan kala duwanaanshaha dhaqanka, isirka, luqadaha iyo dhaqaalaha iyaga lagu daryeelayo.

### *Sheekooyin ka yimid goobta*




*Marisela waxay eegtay sida Mason uu ugu shaqaynayo maqaska. Waxay dareentay in uu maqaska ku hayo suulkiisa hal god far dhexaadkana dhinaca kale. Suulkiisu wuxuu saarna xagga hoose fartiisuna waa korreysay. Taaso sababtay, isagoo jaray, maqaskiisu ay jar-jartay warqaddii. Mason dhowr jeer ayuu isku dayay in uu ka shaqaysiiyo maqaska kahor inta aanuu eegin caruurta kale ee ku hareeraysa. Marisela waxay u soo dhowatay Mason, si taxaddar leh ayay gacanteeda xaggiisa u soo taagtay iyadoo "suulka ku tilmaamayso OK" (thumbs up). Markaas ka bacdi waxay tiri "Waxaan filayaa in godkaan ay ku jiraan faro badan. Isku day in fara badan qaarkood godkaan ku riddid." Waxay u dhiibtay Mason jeex dhuuban oo warqad adag waxayna kula talisay in uu markale "isku dayo". Markaan Mason wuxuu awooday in uu warqaddii qayb yar ka jarto.*

2

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay II: **Waaya-aragnimada Barashada Koritaanka habboon**

Dhammaan caruurtu waxay u baahanyihiin in jawi hodontimo xambaarsan looga qaygaliyo jir ahaan iyo qiiro ahaanba xasilloon.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay u baahanyihiin in jir ahaan iyo qiiro ahaanba ay ammaan haystaan iyo jawi caafimaad qaba si ay wax u indho-indheeyaan, tijaabiyaan iyo bartaan

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- La adeegso cabirka sharaxaadyada canugga uu jecelyahay iyo lucbadaha iyo qalabka horumarinaya koriimada iyo barashada.
- La aasaaso iyo la sii wado jawi amaan oo barasho caafimaad leh.
- La abuuro jawi soo dhoweyn leh oo ka shaqayn kara bixiyaha guriga iyo ganacsigiisa.
- La dhiso xiriir toggan oo lala yeesho canug kasta.
- La hubiyo in jawigaasu muujinayo iyo ka jawaabayo canug kasta baahidiisa, kartityada iyo danahiisa.
- La oggolaado iyo la soo dhoweeyo kartida koritaanka canug kasta ay wax badan iskood u samaynayaan.
- Lagu soo daro lucbadaha iyo qalab ay daneeyaan iyo waxyaabo kale oo u eg waxa guriga caruurta laga helo.
- La xusho qalab uu canuggu dortay, qalab uu ku tartamo, oo weliba shaqeynaya.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Adeegsanaya qalabka sharaxaadda iyo albaabka weyn ee hore si loo calaameeyo meelaha ilmaha looga ilaalinayo in ay dhulka ku ciyaaraan ama lagu hayo si dhismayaasha aanay uga dhicin.
- Waxay isku toosiyaan qalabka si wixii caadoyinka (badalida xafaayada, cunidda, seexashada iwm.) si fudud loo maamulo oo muhiimadu ay noqoto is dhex galka caruurta.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- La baaro jawigooda iyo go'aamiyo in uu siyaabaha loo hagaajinayo shaqa socodsiinta, meelaha diyaarka ah iyo helitaanka qalabka.
- La hubiyo in jawigu uu dhaqan ahaan ka jawaabayo luqadda.
- La aqoonsado iyo adeegsado cilmi-baaris ku salaysan manhaj la xaqiijiyay in uu caruurta ka caawinayo u diyaargarowga dugsigal.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay bartaan kalsooni iyo dareemaan xasillooni marka ay haystaan saadaal joogta ah una qalma baahiyadooda ee hawlaha, is-dhexgalka, cuntada iyo jiifka

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- La bixiyo saadaal maalin kasto la sameeyo kuna habboon baahiyada caruurta xagga cunista, nasashada ciyaaraha gudaha iyo dibaddaba.
- La dejiyo jadawal maalmeed caruurta iyo qoysaska ka caawiya ogaanshaha wax la filanayo.
- La adeegsado waxyaabo joogto loo sameeya sida fursadaha mid kafool kafool ah (one-on-one) si loo dhiso xiriiro hoose.
- La aqoonsado in caruurta da'doodu kala duwantahay loga baahan yahay in heerar kala duwan loo kormeero.

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- La helo jadwal la maamuli karo oo ku habboon bahida canug kasta ee ku saabsan cunidda iyo jiifka.
- Lagu soo daro waqtiyada inta lagu jiro maalinnimada, marka caruurtu keligood ciyarayaan, kooxo yar iyo sidoo kale koox badan.

*Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Muujiyaan iyo si joogta loo qabatima jadwal howlo joogto ah oo lagu hubinayo jiritanka dheellitir saadaasha waxyabaha joogtada ah iyo waxa la maamuli karo ee lagu taageerayo caruurta.
- loo sharraxo kuwa kale ahmiyadda ay caruurta u leedahay ku lu xirnaansha ciyaaraha iyo xallinta mas'alada.

**Fikradaha muhiimka:** Daryeel bixiyeyaasha qoyska ee canugga wuxuu horumariyaan marka si aan ku talagal ahayn ugu oggolaadaan in ay wax sahmiyaan iyo weydiiyaan su'aalo

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- La bixiyo meelo ammaana, qalab iyo waqti ay caruurtu si firfircoon wax ugu sahmiyaan.
- Si farxad leh uga faalloodaan waxyaabaha ay caruurtu dareemaan ama bartaan.
- La weydiiyaan su'aalaha looga jawaabi karo "haa" ama "maya" si caruurta loogu dhiirrigaliyo in si qoto dheer wax uga fakaraan.

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Caruurta lagala hadlo waxaa la xariira sababta iyo saamaynta; Laga jawaabo wacyigalinta dhallaanka sababta iyo saamaynta (tusaale, marka uu dhallaanku ku ciyaarayo lucbadaha booda waxa aad ku odhan kartaa "waxaad riixday batoonka kol kaasay kor u booday").
- Caruurta ku dhiirl galiyaan waydiinta su'alo jawaabaha helaan iyo sida macluumaad loo is ku habeeyo.

- Sii caruurta siyaabo ay ku helaan qalab dabiici ah iyo jawi iyago lagu siinayo waqti ay dibadda ku soo ciyaaraan iyo dibadda u qaataan (pinecones iyo abuurka geedaha).
- Cod dheer (lagu yiraahdo "Waxaan la yaabay waxa dhici doona" ama "Waxaan la yaabsanahay sababta ay sidaas ku noqotay").

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Ku caawinayaan caruurta indho-indheynta iyo ururinta macluumaadka, su'aala weydiiyaan iyo sameeyaan saadaallo.

## **Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay u baahanyihiin in luqadda iyo eray bixinta loogu sameeyo saldhig adag si marka dambe akhriska iyo eray-bixinta ugu guulaystaan

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Lala hadlo caruurta si lagu taageero horumarinta eray-bixinta iyo in ay fahmaan sida loo isicmaalayo erayada lagu wada hadlayo.
- Ku daydaan sanqaraha u dhallaanku sameynayaan; ciyaaro ay ku qataan sida iyago oo sheekaysanaya.
- Qaadaan heeso iyo ku ciyaaraan luqadda iyagoo isticmaalaya ciyaaro iyo xarakaad kuna celcelinaya dhowr jeer si looga caawiyo caruurta barashada.
- La siiyo jihooyin fudud laguna caawiyo caruurta sidii ay u raaci lahaayeen iyaga.
- Loo akhriyo sheekooyinka loona sheego caruurta sheekooyin.
- Laga fisho lana oggolaado gefafka si caruurtu ugu dhawaqaan erayo cusub.
- La weydiiyo su'aalo aan u baahnayn jawaabta haa ama maya si caruurta loogu dhiirrigaliyo kordhinta isticmaalka weedho dhaadher.
- La suurtageliyo fursado lagu ciyaaro oo ku dhiirrigalinaysa wada shakaysiga sida labbiska, ama isticmaalka telefoonada lagu ciyaaro, taxalka cuntada maqaaydaha, lucbadaha cufka xayawaanada.
- La hubiyo in ay jiraan buugaag badan iyo qalab daabacan oo heerkooda ku habboon oo caruurtu eegtaan.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Lagu dhiirrigaliyo wadahadalka waqtiga cuntada fudud ama waqtiga qadada, waqtiga ciyaarta, waqtiga imaashaha iyo rawaxaadda iyo waqtiyada kale ee maalinta.
- Lagu dhiirrigaliyo canugga inuu su'aalo weydiiyo, ka welwelo waxa dhici doona iyo xallinta dhibaatoyinka.
- Laga caawiyo caruurta in midba midka kale la hadlo ay ku jiran fursadaha caruurtu u helayaan in ay ku xirnaadaan sheekooyinka luqadda guriga looga hadlo.
- Lagu dhiirrigaliyo caruurta kuwooda baranayo hal luqo wax ka badan in ay dareemaan kalsooni marka ay isku dayaan in ay la xariiraan iyagoo adeegsanaya luqadda cusub.
- Ku soo dar noocyo kala duwan qalabka akhriska (tusaale, buugaag ah mala-awaallo iyo kuwo aan ahayn, ilaha qalabka iyo khariirado) iyo qalabka qoraalka ee luqadaha ee ay kooxdu malayso.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- U sharrax waalidiinta iyo kuwa la ah asaagga ahmiyadda ay leedahay horumarinta luqadda guriga looga hadlo.
- Lagu caawiy caruurta fahamka xiriirka ka dhexeeya hadalka iyo erayada daabacan.

## *Sheekooyin ka yimid goobta*



*Markaad soo gasho goobta xanaanada caruurta ee Macy waxaad arkaysaa calaamado ereyo ku qoran yihiin oo ku dhagsan darbiyada qolka, qalabyo la calaameeyay; xurufta luqada ingiriisiga oo ka soo laada albaabka agtiisa iyo buugaag oo aan oolin qaybta akhriska kaliya oo laakiin yaala gees kaste ee qolka.*

*Kol kay Brianna timaado, waxay ku qortaa magaceeda warqad ag taala sawir shuuli ku sawiran yahay. Si farxadi ku jirto ayay u tidhi "Shuuli (Bracelet) wuxuu ka bilaw daa ereyga B, oo la mid ah ereyga magacaygu ka bilawdo." Macy markay la hadashay Brianna hooyadeed, waxay tidhi "Waa in aan qoraa balanta ilkaha ay leedahay Brianna si aanan u iloobin."*

*Brianna waxay tagtay khaanada buugaagta oo ay ka soo qaadatay buugeeda feegarka. Waxay la fadhiisatay caruurta kale miiska, waxayna soo qaadatay qalin qori oo ku jiray koob dhex yaalay miiska. Waxay bilowday in ay ku qorto buugeeda feegarka iyadoo ka sheekeynaysa safar ay iyada iyo aabaheed ku tageen suuqa beeralayda. Miiskii waxaa ku soo biiray cunug kale oo wata buugga sawirada oo ku sawiran sawiro ay ku galeen xaflad ay dhawaan lahaayeen. Waxay bilawday in ay akhrido buuga iyadoo xasuusanaysa talaabooyinka lagu sameeyo buskud macmacaan kor ku leh oo loogu talo galay xaflada. Iyadoo tilmaamaysa si qosol ku jiro, sida wajigoodu uga wasakhoobay markay dhameeyeen cunitaaka buskudkii.*

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay bartaan xisaabta iyo fikradaha cilmiga sayniska iyagoo sahminaya waayaabaga iyaga ku hareeraysan

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- La siiyo caruurta fursado ay ku tiriyaan, cabbiraan, ku kala soocaan iyo dhowr shay isku geeyaan.
- La siiyo qalab dhowr siyaabood loo isticmaali karo (blokyada) caruurtu wax ku sahmiso, ku tijaabiso iyo dhibka ku xalliso.
- Isticmaalaan xarfo xisaabta, sida "wax badan," "wax yar," "sare," "hoos," "dheer," iyo magacyada muuqaallaa iyo lambarrada.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Ka caawinayaan caruurta aqoonsiga mardiimaha.

- Fidiyaan aqoonta caruurta ay u leeyihiin dabeecadda, noolaha iyo qalabka iyadoo lagu bixinayo sheeyo, agab iyo waaya-aragnimo u oggolaanaysa in ay ku indho-indheeyaan iyo ku sahmiyaan fikradaha sida sababta iyo saamaynta, waqtiga, cimilada, sabbaynta iyo walxa u baddalidda.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Kordhiyaan fikirka caruurta iyagoo ku caawinaya, eegaya, aruurniya war bixin, waydiinaya su'aalo tilmaamaya waxay soo barteen.
- Lagu siiyo guriga waalidka xisaab iyo cilmi saynis fudud.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay u baahayihiin ammaan, quudin xiriiro ay la yeeshaan qaangarada oo ka caawiya iyaga barashada tarbiyada si toosan, caddaalada iyo saxiibtinimo leh

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Dhulka lala fariisto oo lala ciyaaro caruurta.
- La siiyo diirrimaad, dareen, xannaano, oggolaasho iyo ammaan.
- La dejiyo shuruudo cad iyo xeerar fudud.
- Dib loo jiheeeyo inta aanay ku dhicin dhaqamada dhibaato keeni kara.
- Lagu caawiyo caruurta barashada qaab kale oo ay wax ku sameyaan iyaga oo aan lagu bah dilayn marka ay sameeyaan wax loo arko khalad ama wax halisa.
- Isticmaal caddaymo togan si aad u hoggaamisid hab-dhaqanka caruurta si ay u bartaan waxa la sameynayo. Tusaale, "Xasuuso in aad jaakaddaaada meel surto."
- La aqoonsado iyp laga jawaabo calaamada cadaadiska iyado la siinayo waxyaaba joogto loo sameeyo, xiriir xannaano la isku hallayn karo iyo iyadoo la dejiyo canugga.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Gartaan sidii aad ula dhaqmi lahayd ilmo ka badan hal cunug tusaale adigoo mid u heesaya cunug kalena ruxaya.
- Iska ilaaliyaan tarbiyada xun adigoo badalaya jadwalka, siinaya fursado uu ilmuhu ka helayo, siinaya fursado sare oo yara adag oo laakiin la samayn karo iyo abuuraya fudaydnimo u gudubka qaybaha kale ee jadwalka.
- Ku caawinayaan inay joojiyaan, ay neefsadaan, kana fikiraan inta ay ku dhaqaaqin xaalad xanaaq keeni kara.
- La heshiiyaan qaybaha ka mida qoyska si looga hortago dabeecada adag iyo u jawaabida talaabooyin isku mid ah marka ay joogaan guriga iyo rugta xanaanada ciyaalka. Raac shuruudaha lisenka hadii uu waaliku codsado sida looga jawaabo dabeecadaha aan la ogolayn.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Helaan siyaabo lagu caawin karo in uu ku lugyeesho go'aan qadashada sida inay ciyaaraan laba cuwaaf dhexdooda ama ka bacdii.
- Qabatimaan jadwalka, waxyaaba joogtada loo sameeyo iyo bey'adda si looga feejignaado dhaqamada dhibka leh.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay u baahanyihiin barashada in ay iiyagu isdejiyaan, muujiyaan dareenkooda iyo isqabtaan inta aanay xaaladaha ka falceli

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- La aqoonsado, xurmeeyo iyo lagu cawiyo caruurta barashada iyo la muujiyo dareenka iyo la fahmo dareemada kuwa kale. Tusaale, waxaa ku oran kartaa canugga "Qof careysan ayad u egtahay. Alex u sheeg ma jeclid in blokyadaada ay soo dumaan."
- Lagu caawiyo caruurta sidii ay u maareyn lahayeen jawaabahooda jirka iyo qirada ay ka muujinayaan, fiira gaara yu yeeshan iyo samaynta xulashooyinka fudud.
- Caawi dhalaanka, socod baradka, iyo caruurta yar sidii ay u dagi lahaayeen marka ay garan waayaan siday ku dajin lahaayeen.
- Qaabaynta is-xakamaynta.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Taageeraan caruurta korriimo madaxbannaan iyado lagu dhiirri galinayo caruurta in ay doortaan hawlahooda iyo xalliyaan mushkiladaha.
- Lagu dhiirrigaliyo caruurta in ay joogsadan iyo kafakaraan inta aanay ka fal-celin dhibaatada.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Baraan caruurta in ay xakameeyaan dareemadooda deg-degga, la muujiyo baaxadda qiirooyinka iyo laga fakaro xallinta dhibaatooyin badan (eeg ilaha hoose).

### *Sheekooyin ka yimid goobta*



*Daqiiqado yar ka hor sheekada waqtiga, Maria waxay dhex qaaday carrurta waxayna kala hadashay wax ku saabsan ciyaarahooda. Intii aanay u dhaqaaqin canugii ku xigay mid kasta waxay u sheegtay in shan daqiiqo gudahood in meesha la nadiifiyo dibaddana looga baxo. Maria markii ay soo gaartay "Luis, wuxuu isticmaalaya bloogyada caruurtu ku ciyaarto si ay ugu muujiyaan qalmanta noo kasta oo ka mida lubadda balaastikada xayawaanada ee lagu dhigay beerta xayaanka. Xaggiisa ayay ku soo foororsatay waxayna ku tiri." Luis xerooyin badan ayaad u haysataa xayawaanada. Maria waxay tiri "Waxaanu donaynaa in aan nadiifino oo dhaqso dibada u baxno." Luis waa dhiidhiyay, "Wuxuu yiri maya, dhawaan ayaan soo qaatay oo aan diyaariyay!" Maria ayaa waydiisay "Maxaad qaban kartaa marka aad donayso inaad kaydsato shaqadaada ka socota goobaha balookyada dhexdooda?" Luis wuu dhalaalay, "Wuxuuna ku jawaabay sawir ayaan ka qaadi karaa isaga ama waxaan samayn karaa calaamad odhanaysa tashiil." Maria waxay ugu jawaabtay, "Waa sax. Mid kee baad doonaysaa*

*in aad samayso manta?" Luis hal daqiiqo ayuu ka fikirayay inta aanu gaadhin go'aan kiisa, "Waxaan doonayaa in aan dhigo calaamad ah tashiil wax yar ka dib." Maria waxay bilowday in ay ku ciyaarto heestii nadaafada iyadoo caruurta oo idil ay kala shaqeyeen in qashinka dibada loo saaro marka qolka la nadiifiyo. Maria waxay waydiisay caruurta "Maanta ayaa guulaystay? Heesta ama caruurta?" Caruurtii waxay ku qayliyeen iyagoo riyaaqsan "Caruurta caruurta!" Maria waxay xisaabisay tirade tiirarka khariirada caruurta ee guusha.*

**Fikradaha muhiimka:** Caruurta si xooggan oo habaysan ayaa murqahooda waaweyn iyo kuwooda yar-yar u korayaan

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Loo sameeyo waqti gaara caruurta ay ku dhaq-dhaqaajiyaan jirkooda oo la sameeyo meel amaan ah dhalaanka oo ay is ku galgalshaan, ku guurgurtaan, ku socdaan iyo ku wooda waa wayn meelo ay ku ordaan, ku bood boodaan, ku koraan, ku qoob ciyaaraan, baaskiil ku wadaan, iyo ku turaan.
- La siiyo dhallaanka fursado ay ku tijaabiyaan iyagoo adeegsanaya murqaha gacmahooda iyo calaacalaha ay ku gaadhaan, ku qabsadaan, ku riixaan, ku raseeyaan, isku geeyaan waxyaabo sida hal xidhayaasha,
- La siiyo caruurta kuwooda waawayn in ay tijaabiyaan gacmahooda, faraha kuusha, qataarka, xidhida, furida iyo qaadida shay yada yar yar.
- La siiyo caruurta qalab ay u isticmaalaan sawiradda iyo qorista.

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Lagu dhiiriigaliyo qoysaska in ay kala qaybqaataan hawlgallada jirka caruurtooda, gudaha iyo dibadda labadaba iyo meelaha caadiga ee la fariisto sida beeraha nasashada iyo garoomada ciyaaraha.

*Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Loo helo caruurta siyaabo ay caruurtu ku dhaqaajiyaan inta ay ku hawlan yihiin barashada noocyada idil ee hawlaha waxbarashada.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay hantaan dareen awood xambaarsan, raaxo leh iyo ay bartaan in ay dhexdooda wax iskuu sheegaan iyago kaashanaya qalab dhammaad ee dibadyaalka, hawlqabadyo iyo su'aalo

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Ku bixiyaan siyaabo badan waaya-aragnimada muusikada, sida heesidda, muuskida lucbadaha iyo noocyo kala duwan ee heesaha duuban. Ay ku jiraan qaraamiga, heesaha caruurta loo heeso (lullabies, classical, hees caruureedka ee dhaqamo iyo luqadaha kala duwan).
- Siiyaan qalab badan ee farshaxan oo si madaxbannaan loo adeegsado oo noqon kara qaabka is-qawlka, lagu beegsanayo habka (sida ay iyagu u adeegsanayaan qalabka) halkii ay qishi lahaayeen weedhaha.

- Siyaan wax yaabo badan oo ay daawadaan sida muqaalo, sawiro, farshaxan caruureed iyagoo goobta buuxinayn.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Ku dhiirrigaliyaan sahanka furfurka qalabka dhamaaday sida cajiinka lagu ciyaaro ranjiga faraha iyo calaamadaha.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- U sharraxaan kuwa kale sida caruurtu u bartaan in ay ku muujiyaan fikradahooda, dareemada iyo aaraa'da farshaxan, qoob-ka-ciyaar iyo muusikada.
- Lagu soo dhoweeyo caruurta farshaxan, muusik iyo qoob-ka-ciyaar ka yimid dhaqamo badan.

## **Fikradaha muhiimka:** Caruurta waxay ku bartaan cayaaraha dhexdooda iyo is-dhexgalka ay la yeeshaan asaggood

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- U oggolaadaan blogyo dhaadheer waqti ay ku ciyaaraa iyada oo aan la soo dhexgalin. Cayaaraha waxay ka helaan hodontimo iyo wax macana weyn ku fadhiya markii ay haystaan 30 illaa 40 daqiiqo oo ay wax jilaan.
- Siiyaan qaab u oggolaanaya caruurta in ay ku labbistaan, wax ku jilaan iyo ku ciyaaraan muuqaallo dibadda ay ka soo arkeen sida miiska oo qadada loo fariisto ama maqaayadda oo la aado.
- Caruurta ku caawiyaan barashada cayaaraha iyadoo mararka qaarkood cayaarta laga qaybgalaya, lagu cayaaro meel canugga soo xigta ama iyo la siiyo ilo taageeraya cayaarta.
- Tusaan qaabka iyo siyaabaha loola wadaago sida kuwa kale loo caawiyo iyo hawl kooxeed loo sameeyo.
- La siiyo caruurta qol iyo waqti ay iskood ku xaliyaan dhibaatooyinka ama ay weheliyaan kuwa kale. Marka arinta amaan ku ahayn. Waxa meesha ku jira iyadoo laga ag dhawaanayo iyo la siinayo taageero markaa loo baahdo.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Qeexaan midka heerka barashada la samaynayo inta ciyaarto socoto. Tusaale, canugga wax tirinaya wuxu iska dhigaya sida "rukun" wax xisaabinya.
- La ballaariyo aragtiyada cayaaraha caruurta iyadoo la siinayo wax ay meelo kuu tiiriyaan ama ballaariyan curinta sheekooyinka. Tusaale, marka caruurtu ku andacoodaan in ay lacag u baahanyihiin ay sida baska iska yeelaan, kula tali in ay lacag ka sameynayaan dhisma cagaaran ee warqad ka samaysan.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- U sharraxayaan kuwa kale muhimadda ay ciyaartu u leedahay iyo barashada hore heerarka ciyaaraha lagu socodsiinayo.

### Sheekooyin ka yimid goobta



*Caruurtu waxay sameeyeen hal saf oo kuraasa. Will wuxuu yiri aan iska dhigno sidii annagoo tareen saran waxaana aadayaano woqooyi glabeed. Canugga u horreeya koofiyad ayuu gashanaa. Wanda waxay gancanta ku wadatay garangarta isteerinka. Stephanie waxay sidatay affar-geesle badan oo midabyo badan leh kana samaysan maro khafiifa ah inta sanduuq ay ka soo saarto ay caruurta mid mid u siisay. Waxay baafisay, "Waxaynu tagaynaa meel qabow si aan u soo aragno shimbir badeedka (penguins) ku nool meelaha barafka waxaan u baahan doontaa bustahaan." Wanda waxay tidhi, "Wuxuu noqon doonaa safar dheer sababtoo ah waxaad haysataa barkimo iyo bustayaal." Wanda waxay aragtay Mia oo ag taagan oo leh, "Halkan boos ay Mia fadhiisato ma jiraa?" Stephanie ayaa barkin uu dhiibtay Mia, waxayna tidhi, "Barkintan ayay ku fadhiisan kartaa." Jerome ayaa yidhi, "Waxaan doonayaa in aan sahamiyo." Will wuxuu sheegay, "Taas ma samayn karno. Tareen ayaan saaranahay." Wanda waxay tidhi, "Qof kasta waxaan u baahanahay in aan dhagaysano fikiradiisa. Aan tijaabino sida fikradaha la is waydaarsado. Sidaynu u sameen karnaa waxyaabahan oo dhan?" Stephanie waxay tidhi, "Anigaa garanaya, waanu soo sahamin karnaa shimbir badeedka (penguins) maka aynu ka dagno tareenka."*

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay III: **Xiriirka Waalidka**

Xiriirka ugu muhimsan ee canuggu la leeyahay qoyskiisa. Barbaariyeyaashu fahmaya kan waxay waqtiga ku qaataan dhismo xiriir xurmo leh ee togan oo lala yeesho canugga qoyskiisa. Xog is-dhaafsi joogta ah oo dhexmarta barbaariyaha iyo qoyska canugga waxay ka caawin doontaa qancinta baahiyada qaarkkod ee canugga siyaabo taageeraya horumarinta caafimaadka.

## **Fikradaha muhiimka:** Qoysasku waa kuwa barbaariyaha iyo daryeel bixiyeyaasha ugu horreeya iyo ugu muhimsan ee caruurta

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Laga caawiyo waalidka iyo xubnaha qoyska dareemaan soo dhowweyn.
- La aqoonsado, xushmadda iyo la dhiso awoodaha qoyska.
- Lagu taageero kala maqnaanaansho iyo midayn togan waqtiga la keenayo iyo waqtiga la qaadayo iyadoo loo oggolaanayo waqti ay ku yiraahdaan qoysaskood nabadeey iyo loo daayo caruurta in ay keydsadaan hawshooda ama qalabka si ay u sii wataan caayaartooda waqtiga xiga.
- La dhageysto iyadoo la fahmayo bahiyada iyo walaacyada qoysaska iyadoo la haysto mihnadaha xudduudaha.
- La xurmeeyo iyo kor loo qaado xuquuqda qoysaska si ay iyaga go'aamadooda u gaaraan ee la xariira baahida caruurtooda.
- La ilaaliyo waxyaabaha gaarka iyo dhowrsanaanta macluumaadka qoys kasta, marka laga reebo in xaraynta warbixinada ay qasab tahay si loo ilaaliyo ammaanka xubnaha qoyska (tusaale Adegyada Ilaalinta Canugga - Child Protective Services).
- La taageero luqadda guriga ee canugga iyo si leh fur-furnaan iyo xasaasiyad dhaqanka iyo habka gaarka ee daryelka qoyska, xog is-dhaafsiga iyo is-dhexgalka.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- La wadaagayaan qoysaska sida loo xalliyo dhibaatooyinka iyo loola shaqeeyo qoysaska waxa heshiiska lagu wadayahay sida hadafyada canugga. Mararka qaarkood waxaa dhici kara codsiyo ka yimaada waalidka oo aan la ogolayn sida in loo ogalaado dhalaanka in uu busto ku seexdo.
- Waa in ay caddahay cidda ka masuulka ah caawinadda canugga waqtiyada la soo qaadayo iyo la keenayo.
- La aasaaso xog- is-dhaafis furan oo ay ku jiraan tilmaamaha hawlaha malmeed iyo dhacdooyinka.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Muujiyaan hidda dhaqameedka shaqsiyeed iyo malooyinka saamaynaya qiyamka, go'aamada iyo hab-dhaqanka si loo aqoonsado marka malooyinkaas (waxa la rumaysanyahay) laga yaabo in ay sababaan dhibatooyin iyo khilaafyo.
- Taageeraan caruurta iyo waalidka marka la geeyo dugsi ama barnaamij cusub.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurta iyo qoysasku waxay u baahanyihiin barbaariyeyaal aqoon u leh jaaliyadda iyo ku hagi kara khayraadka marka loo baahdo

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Waxay aqoonsadaan khyraadka jaalliyada iyo la siiyo qoysaska macluumaad.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- La xariiriyaan walidka iyo ilaaliyeyaasha hay'adaha jaaliyadda, adeegyada caafimaadka ama bulshada, marka ay tahay lagama maarmaan.
- La shaqeeyaan iyagoo la wadaagayaan qoysaska iyo xeeldheerayaasha (caafimaadka, dhaqtarka ilkaha, hadalka, quudista iyo caafimaadka dhimirka) si loogu qalmo baahiyada canugga.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay la shaqeeyaan xirfadlayaasha kale ee ku lug leh ilmaha si ay si fiican ugu daboolaan baahidooda.

### *Sheekooyin ka yimid goobta*



*Tremaine iyo hooyadii waxay irida ka fureen goobta Xanaanada Ciyaalka ee Joy. Tremaine gacanta hooyadii ayuu ku dhagan yahay. Waxay ka caawinaysaa in uu jaakada meel saarto, kabahiisa buudhka ka siibto. Marka uu gacmiihiisa meedhay, qolka ayeey galeen halkaasoo caruurtu kale ee ku ciyaarayeen. Tremaine wali wuxuu haystaa gacanta hooyadii wuxuuna u ooyay si tartiiba. Joy waxay ku tidhi cunugga agteed fadhiyay, "Waxaan caawinayaa Tremaine in uu maca salaameeyo. Wuxuu dareemayaa murugo ayuu dareemayaa manta." Way foorarsatay si ay si tartiib ah u la hadasho Tremaine. Si wada jir ah ay qolka hareerahiisa u eegeen, markaas ayay u sharaxday waxay ciyaalka sameenayeen. "Tabitha iyo Izzy waxay ka shaqaynayaan hal-xiraale. Shawn wuxuu is ku xirayaa goobooyin (loops). Silsiladiisu waxay ka dheertahay isaga! Maxaad doonaysaa waxa ugu horeeya in aad samayso?" Tremaine wuxuu yidhi, "Waxaan caawinayaa Shawn." Hooyadii waxay ku tidhi, "Diyaar ma u tahay in aan tago? Hab isii. Ka bacdii Joy hab iyadana sii, waxaynu is arki doonaa hurdada ka bacdii." Tremaine wuxuu yidhi, "Nabadeey hooyo, nabadeey hooyo, nabadeey hooyo," isaga iyo Joy oo u soo dhaqaaqaya dhanka silsiladii dheereed ee taalay qolka dhexdiisa.*

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay IV: **Qiimaynta, Eegidda iyo Shaqsinimo**

Taxaddar iyo fiira gaara oo loo yeesho canugga cayaartiisa, is-dhexgalka, iyo sida canuggu u sahminayo waxyaabaha ku hareeraysan waxay ka caawin kartaa barbaariyaha bixinta barashada hawlgallada iyo waaya-aragnimada oo noqon kara waxa ugu weyn oo macna weyn ugu fadhiya canugga.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay sameeyaaan waxooda ugu wanaagsan marka barbaariyuhu uu isha ku hayo uu isticmaalo waxay barteen si loo horumariyo korrimadooda

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Waxay u fiirsadaan cunug kasta kariyadiisa qof ahaaneed iyo waxa uu xiiseeyo.
- Waxay siiyaan hawlo ama qalab uu cunug kasta uu ka helo (Marisela waxay og tahay in Mason uu jecelyahay kubada cagta. Waxay aaday maktabada si ay u raadiso buugaag sawirro ku yaaliin ciyaartoyda kubadda cagta).
- Waxay indha indheeyaan xirfadaha ay caruurtu ka shaqeeyaan iyo in aad diyaarisid hawlo ka caawinaya tijaabada.
- La wadaag qoysaska waxa ay caruurtu ay ka helayaan, barteen iyo ay tijaabiyeen.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Si joogto ah u hayaan xogta (qoran, liistooyinka iyo aaggaga cayiman ee horumarinta, samballada shaqada iyo sawirrada) ee kartiyada guulaha caruurta.
- Eegaan horumarka laga sameeyay waqtiga barashada iyo horumarinta.
- Adeegsadaan indho indhaynta ee qorshaha ku talo galka waxqabadyada loogadan leeyahay ee kor u qaadaya koboca korniinka.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Isticmaalaan qalab lagu qiimeeyo uruurinta macluumaadka ku saabsan cunug kasta.
- Isticmaalaan macluumaadka laga helay qiimaynta in lagu qorsheeyo iyo in lagu hago manhajka, barida, iyo isdhexgalka caruurta.
- Aqoonsadaan oo ay isticmaalaan qalab ka caawinaya aqoonsiga xirfadihiisa iyo qorshaha hawlqabadyada ee horumarinaya korriinka iyo barashada cunugga.

4

**Fikradaha muhiimka:** Barbaabariyeyaashu waxay u baahanyihiin in ay ogaadaan shuruudaha looga baahanyahay baaritaanka koboca iyo korrimada iyo sida loogu caawinayo aqoonsiga baahiyada shaqsiyeed

***Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:***

Waa in ay garanayaan xeerarka iyo nidaamyada u degsan caafimadka iyo baarista koritaanka. La siiyo qoysaska macluumaadla ku saabsan baaritaanka iyo shuruudaha baaritaanka.

### *Sheekooyin ka yimid goobta*



*Subax ka mida dhowr bilood ka hor, waxaan tagay guriga xanaanada cunugga ay dhigato gabadhayda, waxaan arkay Nicole, oo ah bixiyaheena, oo ku labisan dhar madow sida kuwa ay xidhaan shaqaalaha makhaayadaha. Waxaan su'aalay sababta ay ugu labisatay dharkaa, waxayna ii sheegtay in maalmo ka hor ay aaday fasal ay ka sheekeynayeen arimo ku saabsan sida loo raadraaco kobaca koritaanka caruurta. Waxay I tustay calamadaha warqadaha boostada ay ku haysatay jeebka dharkeeda, waxayna sheegtay waxaan rajo ka qabaa qoraalada Linnea ay ka baranaysay xanaanada cunugga.*

*Wixii ka dameeyay todabaadyada soo socda, waxaan arkay qoraal ka sheekenaya waxay Linnea qabanaysay. Nicole waxay bilowday buugga qoraalka oo qaybo badan oo ka mida ay ahayeen sida la ciyaarida saaxibada, iyo xirfadaha xisaabta. Marka ay aragtay Linnea oo ka shaqayneysa xirfad, waxay ku qortaa sumada warqada boostada oo ay ku rido mid ka mid ah. Mararka qaarkood waxay siisay sumada boostada Linnea waxayna waydiisay in magaceeda ay ku qorto. Run ahaantii waxay ahayd wax lagu qoslo oo dib loo xasuusto mararkii ugu horaysay oo ay qorto magaceeda kadibna la arkay isbadalada ay samaysay kolba marka ay tijaabiso.*

*Hooyada Linnea*

5

Qaybta uu Ka Kooban Yahay V:
# Taarikhda iyo Waqtiga Xaadirka ee Horumarinta Waxbarashada Hore Ee Caruurta

Barbaariyuhu wuxuu fahmayaa waxa la rumaysnaa iyo waxa lagu qabtay saamaynada dhacdooyinka waqtiga xaadirka. Wuxuu kaloo ku dadaalaa in uu fahmo dhacdooyinka waqtiga xaadirka iyo iya arrimaha sida ay u saameeyeen caruurta, qoysaska iyo barnaamijyada.

**Fikradaha muhiimka:** Barbaariyeyaashu waxay u baahanyihiin in ay fahmaan fakarka ku hoos jira dhacdooyinka iyo nidaamyada hadda jir

***Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:***

- Waxay aqoonsadaan dhaqamada taariikhiga iyo saamaynada dhanka baarnaamij diyaarinta waqtiga xaadirka iyo is-dhexgalka caruurta dhexdoodaku wajahan.
- La aqoonsado qiyamka iyo barnaamijka kor loogu qaadayo daryeelka hore iyo waxbarashada.

***Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:***

- Si joogta ka shaqeeyaan hagaajinta diyaarinta iyo bixinta xanaanad tayo sare leh.

### *Sheekooyin ka yimid goobta*

*Waxaan doonayey in aan ka mid noqdo barnaamijka ka war haynta waalidka (Parent Aware) sabab too ah waxaan ku sifeyn lahaa ka war haynta waalidka barnaamij qiimayn oo u ogolaanayo bixiyeyaasha in ay u cadeeyaan waalidka in ay haystaan waxa loo baahan yahay kuna siyaadinayaan tayada barnaamijka xanaanaynta caruurta. Wuxuu hubinayaa in ay caruurtu ay diyaar u yihiin bulsho ahaan, garasho ahaan iyo qiiro ahaan ay diyaar u yihiin dugsiga abaabinta. Bixiye ahaan wax badan adiga kugu saabsan ayaa laga hadlay marka aad tageeyso meel ka durugsan si aad u samayso barnaamij tayo leh. Waxay muujinaysaa in aad adigu run ahaan ku taagan tahay mowqifkaaga iyo caruurta oo is badal loo sameeyo. Waxaan filayaa in waalidku ay bilaabayaan in ay noo yimaadaan oy ii arkaan bixiye ahaan aysan ii arkin mid ilmo haysa (babysitter) si kaste tani waa muhiim.*

*Bixiyaha xanaanada cunuga ee Jackie waa qayb ka mid ah fidiyowgaYoutube: In Their Own Words: Family Child Care Providers Talk about Parent Aware.*

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay VI: **Ku dhaqanka Mihnada**

Cilmi baarista ku saabsan horumarka canugga waa mid soo kobcaysa iyadoo dhaqamada wanaagsan ay si xawl ah u soo hagaagayaan. Waxaa muhiim in barbarayaashu ay sii haystaaan xirfado horumarin iyo ka qaybqaataan ururada mihnadaha oo siyaadinaya aqoontooda iyo hagaajinaya xiirfadahooda.

**Fikradaha muhiimka:** Barbaariyeyaasha caruurnimada hore waxay ku dadaalaan in ay si joogta u hagaajiyaan xirfadahooda

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Waxay qof ahaan uga shaqeeyaan shuruudaha federaalka, gobolka iyo shuruucda, siyaasadaha, dhaqamaha hayadaha maxalliga ah.
- Waxay diirada saaraan daryeelka ilmaha inta lagu jiro saacadaha shaqada.

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Waxay la socdaan isbedelada xeerarka shatiyeynta, sharciyada barnaamijka, xeerarka iyo nidaamka cuntada.
- Waxay dejistaan sharciyo iyo habraacyo waafaqsan dhammaan sharciyada iyo xeerarka.

*Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay ka sii gudbaan halbeegyada ugu hooseeya ee loo dejiyay sharciyada iyo qawaaniinta iyaga oo loo shahaadaynayo ama ka qayb qaadanaya Parent Aware.

**Fikradaha muhiimka:** Bixiyeyaasha xanaanadaynta Caruurta waxay ku dadaalaan in ay si joogto ah u hagaajiyaan xirfadahooda

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Waxay si buuxda uga qaybgalaan oo ay la socdaan mihnado horumareed iyadoo la iska waydiinayo su'aalo tusinaya barashada iyo ku dhaqanka maclumaad cusub.
- Qof ahaan lagala shaqeeyo Ururka Qaranka ee Waxbarashada Caruurta yar anshaxa iyo edebta (Nathional Association for the Education of Young Children code of conduct.)

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Waxay sameeyaan qorshe ula jeeda leh iyo wata mihnado horumarineed oo lagu hagaajinayo xirfadahooda.

- Fahmaan kuna howl galaan xuduudaha mihnadaha.
- U isticmaalaan xeerka anshaxa NAEYC xalinta mushaakiladaha (eeg ilaha).

*Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Qaabeeyaan dhaqamada wanaagsan ay tusaan dadka kale.
- Dib u eegaan dhaqamadoodii, cilmi baadhista iyo jihooyinka ee goobta ayna hagaajiyaan habdhaqan kooda.
- Ka noqdaan xubin gala ururada mihnadaha iyo howl qabayada.

**Fikradaha muhiimka:** Bixiyeyaasha ee dhiga heerka caruurnimada hore waxay wax ka bartaan dadka kale iyo hirgaliyaan dhaqamada ugu wacan

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Waa inay indho indheeyaan isdhex galka dadka kale ay la leeyihiin caruurta oo lagu muujiyay fiidyowga ama barnaamijyo kale oo laga barto meelaha ay ku wanaagsan yihiin.

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Dib u muujiyaan xirfadahooda iyo in ay si joogto ah uga shaqeeyaan siday u hagaajin lahaayeen.
- Raadiyaan warcelin mihnadaysan iyo layliyaan iyo in an ay dib u muujiyaan guulaha iyo caqabadaha.

**Fikradaha muhiimka:** Bixiyeyaasha xanaanada caruurta waxay isticmaalaan dhaqamada wanaagsan ee ganacsiga

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Waxay abuuraan miisaniyad sanadeed.
- Waxay qorsheeyaan ququl lacageed oo ku salaysan diiwangalinta iyo kharashyada raashiinka, aqabka nadaafadeed, qalabka waxbarasho iyo ujrada shaatiyada.
- Waxay si cad oo hufan u kaydiyaan xoogaha ganacsi.
- Waxay kala hadlaan waalidka wax ku saabsan nidaam yadiisa siyaasadeed.

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- La galaan qoysaska heshiis cad oo qoraal ah.
- Qoraan nidaamyo buuga waalidka iyo kala hadlaan waalidka.

*Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Dib u eegaan si joogta ah cusboonaysiinta heshiiska iyo buuga waalidka.

## *Sheekooyin ka yimid goobta*

*Carolyn, waa bixiye waayo arag ah oo ka shaqeeya xanaanada cunugga, waxay sheegtay waxaa ugu muhimsan aan dadka kale ee billaabaya xanaanada caruurta:*



*"Wadida ganacsiga xanaanada caruurta kuma eeka in lala ciyaaro iyo wax la baro caruurta kaliya. Khalad ha iga fahmin, taasi waa qaybta aan u daneeyo. Laakin, dhab ahaan waa in aad yeelataa iyo in aad isticmaasho xeelado shaqo wanaagsan. Wax badan ayaad samayn kartaa si aad iskaa wax isku barto, qaado fasalo, iyo la hadashid bixiyeyaasha kale. Ha ka xishoon marka aad taliye fiican. Intaasoo kadib, ma garanaysid waxa aanad garanayn! Waa in aad garatid waxa aad u baahan tahay in aad kaydsatid xoogo wanaagsan, waxa ay yihiin shuruudaha canshuurta iyo arimaha caymiska. Waxa aad u baahan tahay in aad ogaato lacagtaada halka ay ku socoto, xisaabi waqtiga iyo inta kuu banana iyadoo waxa ugu muhiimsan uu yahay qorshaynta howlgabkaaga."*

7

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay VII:
# **Caafimaadka, Ammaanka iyo Quudinta**

Marka la weydiiyo waalidiinta waxa iyaga ugu muhiimsan iyaga marka la raadinayo barnaamijka caruurtooda, jawi caafimmaad iyo ammana oo liistada xaga hore kaga jira. Caruurta marka ay koox u fadhiyaan waxay u baahanyihiin ilaalinta qof qangaara si ay ugu joogaan jawi caafimad iyo ammaan leh. Jawiga caafimaadka leh sidoo kale waxaa lagu macneeyaa in la siiyo caruurta quudin raashin iyo fursado maalmeed ee la xariira hawlaha jirka. Cilmi-baarista waxay muujinaysaa in caruurta baahiyada saldhigga caafimaadkooda la qanciyay ay ku fiicanyihiin awoodda waxa ay ka baranayaan bey'addooda ay aad ugu diyaarsanyihiin in ay ku guulaystaan dugsiga marka loo eego caruurta caafimaadkoodu liito.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurta caafimadka qabta waxay si fiican uga qayb gali karaan oo ay ka baran karaan hawllgallada

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Waxay xoojiyaan cuntayn iyo noolol maalmeed caafimaad leh iyadoo la siinayo hawlqabadyo jirka iyo loo fidinayo quudin cunto noocyo badan ee hamuuntirrada iyo cuntada caadiga.
- Waxay isticmaalaan, oo ay baraan carruurta inay isticmaalaan, caadooyinka caafimaadka aasaasiga ah sida daboolida qufaca iyaga oo ku qufacaya suxulka, gacmo dhaqida, iyo cadayashada ilkahooda.

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Ay haaystaan macluumaadka waqtiga la joogo ee ku saabsan caafimaadka iyo ammaanka iyo lagu soo daro macluumaadka cusboonaysiinta ee dhaqamada malinlaha.

**Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay ka bartaan qaangarrada horumariyaan caadooyinka cafimaadka cimriga dheereeya

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Ha geeyaan caruurada dibadaha sida hadba suurtagal ah.
- Siiyaan waqti, tusaalooyin iyo fursado lagu xanaaneeyo bahiyadooda xagga qubayska iyo labbiska laf ahaantooda.
- Ku dhiirigaliyaan caruurta ku xirnaanta hawlgallada jirka oo badan si ay u qabatimaan dhaqamo caafimaad leh.

*Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Waxay qaabeeyaan kuna dhiirrigeliyaan caruurta in ay horumariyaan dhaqamada cunista caafimaad leh, leylis iyo nasasho.

## **Fikradaha muhiimka:** Marka jawigu ammaan yahay, caruurtu waxay aad u awoodaan in ay wax sahmiyaan iyo wax bartaan

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Ha haysto lamabarro telefoon e deg-degga.
- Waxay raacan tusaalooyin caafimaad iyo ammaan marka gacmaha la dhaqayo, musqusha la galayo iyo la fayodhowriyo lucbadah si loo yareeyo cabuqa cudrrada faafa.
- Waa in ay habeeyaan jawiga si caruurta ka hooseeya da'da dugsiga si loo arko ama loo maqlo xili kaste.
- Waa in ay nadiifiyaan qalabka, agabka iyo jawiga guriga in uu amaan iyo nadiif ahaado; sidoo kale jawiga ka dhig mid aan sigaarka lagu cabin.
- Waa in ay raacaan dhaqamada jiifka amaanka ah ee sida dhallaanka oo xaga dhabarka loo seexiyo.
- Si dhaqsiya oo saxan loo sameeyo macluumadka waxyeellada u keeni kara caafimaadka caruurta ama kaalmada cayrta si loo ilaaliyo adeegyada.
- La ogaado xaladaha caafimadka ee caruurta (sida kaadi macaanka, xasaasiyaadka cuntada laga qado, neefta, iwm.) iyo sida looga jawaabayo suurtagalnimada baahiyada caafimadka.

## **Fikradaha muhiimka:** Caruurtu waxay u baahanyihiin quudin habboon oo jirkooda diiriya iyo ka caawiya koboca

### *Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barbaariyeyaashu:*

- Ku dhaqmaan keydin ammaana, diyaarinta maaraynta iyo adeegyada qudinta cuntada ay ku jiraan naas nuujinta.
- Raacaan jadwal qeexan ee cuntada iyo jiifka ee dhallanka iyo socod baradka.
- La fadhiisto, la cuno iyo la hadlo caruurta xilliyada cuntada la cunayo iyo hamuuntirka.
- La aqoonsado iyo laga feejignaado khatarta cafimaad ee la xariirta cuntada sida neef-qabadka iyo xasaasiyaadka.

### *Marka ay daryeel bixiyayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Siiyaan qoyska xilliyada hannaanka cuntada iyo hamuuntiraha iyado lagu dhiirigalinayo caruurta i ay bartaan cunitaanka caafimaadeed.

### *Marka ay barbaariyeyaashu qaabaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Haqabtiraan kala doorashooyinka dhaqanka cuntada marka ay suurtagal tahay.

### *Sheekooyin ka yimid goobta*



*11:45 barannimo, caruurta ku jira xanaanada caruurta ee Elizabeth waxay dhammaysteen in ay gacmahooda dhaqaan waxayna aadeen jikada si ay qadada u cunaan. Jikada, waxay kula kulmeen kuraas iyo miisas isku rakiban oo lix qof loogu talagalay. Kursiga dheer waxaa loo jiiday xagga miiska. Canug kasta wuxuu helay koob midabkooda oo kale leh wuxuuna fariistay meeshiisi. Waxay sugayeen Elizabeth in ay baaquligu ugu shubto brokolaha, gallayda iyo jeex geed-moroodka shiidan. Marka Elizabeth ay caruurta la fariisato, waxay canug ugu yeeratay in ay gacmaha ku qabtaan qaaddo brokoli ah iskuna gudiyaan. Marka Elizabeth ay caruurtii la soo fariisatay, waxay ku marti qaaday in mid kasta oo iyaga ka mida in uu soo qaado qaaddo brokoli ah ka bacdiina mid kale ayuu u gudbiyo. Waxay ku dhiirigalisay mid kale in uu soo qaado qaaddo geed-miroodka shiidan una sii gudbiyo. Biizaha lagu jar-jaray alwaax ama balastik korkiisa oo la safay miiska bartamahiisa. Mid kale waxay xasuusisay in "dhab ahaan inuu tuujiyo carabyada, dhab ahaan dhuujiyo" si loo qaato habuuqa galleyda. Caruurtu waxay bartamaha miiska ku riixeen alwaaxii waa lagu jarjarayay si ay qaataan una sii gudbiyaan biizaha. Elizabeth waxay la sheekaysatay caruurtii sidii iyagoo ka hadlaya filimo ay la daawanayaan qoysaskooda. Intaas kadib waxay mar labaad ayay siisay kuwii weli gaajeysanaa. Waxay kaloo mid kale xasuusisay kuwa saaxiibadood oo laga yaabo in weli wax dheeraada sii raba. Marka ay dhammaysteen caruurtu, waxay ku xoqeen suxuuntii weelka qashinka lagu rido, saxuuntii iyo qaadooyinkii waxay ku rideen saxuun dhaqaha waxayna ka bacdii dhaqeen gacmahooda.*

8

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay VIII: **Tijaabin Lagu Sameeyo Waayo Aragnimada**

Baraha wuxuu wax ka baranayaa iyo baranayaa isticmaalka dhaqamada ugu wanagsan waaya-aragnimada badan dhexdooda.

**Fikradaha muhiimka:** Barayaasha waxay ka bartaan caruurnimada hore iyo fuliyaan dhaqamada ugu wanaagsan.

*Si loo bixiyo daryeel tayo leh iyo adeegyo waxbarasho, barayaashu:*

- Waxay ku eegaan bandhigyada waxyaabo kale ee caruurta soo dhexgala fiidyow iyo barnaamijyo kale waxayna ka bartaan awoodaha ay ku yeelan karaan.

*Marka ay barayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Muujiyaan xirfadahooda iyo ugu shaqeeyaan joogta ahaan iyaga hagaajintooda.
- Baadi goobaan warcelinta xirfadeed iyo tabaridda lana la muujiyo guulaha ama dhibaatooyinkaiyo tababaridda.

* "Ku dhaqan loo marayo Khibrada Caafimaad" ayaa lagu daray nooca Daryeelka Carruurta ee qoyska si ay u muujiyaan waayo-aragnimada bixiyayaasha daryeelka carruurta qoyska ee haysta ama laga yaabo inay sii wataan waxbarasho sare halkaas oo waayo-aragnimada kiliinikada looga baahan yahay. Tani waxay sidoo kale khusayn kartaa indho indheynta loo raadsado ujeedooyinka horumarinta xirfada shaqo ama loogu talagalay dadka arka muhiimada ay leedahay indha indhaynta goobaha kale xitaa haddii aysan raadsanaynin sii wadashada waxbarashada sare. Indho indhaynta waxaa lagu samayn karaa booqashooyinka kombiyutarka lagaga qaybqaadanayo, muuqaal fiidyow ahaan ama booqashada goobaha kale ee FCC.

2020

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay IX: **Daryeel iyo Hab Dhaqan ka Warqaba Dhaawaca Masiibada**

Baruhu waxa uu fahmayaa saamaynta dhaawaca masiibadu ay ku leedahay korriinka carruurta yaryar wuxuuna dhisaa awoodda tarjumidda hab dhaqanka iyo uga jawaabista siyaabo kor loogu qaado bogsashada carruurta, qoysaska iyo naftooda.

**Fikrad muhiim ah:** Nidaamka jawaab celinta caruurta ee ee welwelka, dabeecadaha iyo korriinka guud ayaa waxaa saameeya dhaawaca masiibada.

*Si ay u bixiyaan daryeel iyo waxbarasho tayo leh, barayaashu:*

- Waxay aqoonsadaan siyaabaha waayo-aragnimada carruurta ku jirta barnaamijka dhallaanka iyo socod-baradku ay u saamayso ilmaha, qoyska iyo xiriirada bulshada ee ay leeyihiin awood ay ku taageerto adkaysiga.
- Fahmaan welwelka iyo qeexitaannada dhaawaca masiibada oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn: welwelka togan, welwelka loo dulqaadan karo, welwelka sunta ah ee dhaawaca masiibo hore, dhaawaca masiibada ee adag, dhaawaca masiibada ee taariikhiga ah, iyo dhaawaca masiibada ee jinsiyadda ku salaysan.
- Waxay ogsoonyihiin oo aqoonsanyihiin saamaynta ay dabeecadaha, ficillada iyo korriinka ku leyihiin welwelka iyo dhaawaca masiibadu.
- Waxay sii wadaan in ay wax ka bartaan kala duwanaanshaha dhaqanka iyo muujinta si ay uga fogaadaan in ay kala duwanaanshahaas ku sifeeyaan in uu yahay dhaawaca masiibada.
- Waxay sii wadaan in ay daneeyaan oo ay xiiseeyaan dabeecadaha carruurta iyo sida doorkeena ahaanshaha barayaasha caruurnimada hore aan ugu taageeri karno horumarka carruurta siyaabo wanaagsan. Waxay weydiiyaan naftooda: "Waa maxay macnaha ka dambeeya hab dhaqankani? Muxuu ilmahani iiga baahan yahay hadda?"
- Waxay ogsoonyihiin taageerooyinka iyo khayraadka loogu talagalay carruurta iyo qoysaska ay saamaysay welwelka iyo dhaawaca masiibadu.

## Marka ay barayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:

- Waxay ka caawiyaan waalidiinta inay aqoonsadaan meelaha uu ku fiican yahay ilmahoodu iyaga oo waydiinaya su'aalo ay ka mid yihiin, "Maxaad ugu jeceshahay waxyaabaha ku saabsan ilmahaaga?"
- Waxay si xushmad leh ula dhaqmaan dhallaanka iyo socod baradka si ay u ogaadaan inay muhiim yihiin. Tusaale ahaan, kala hadal ujeedooyinka aad damacsantahay adiga oo sharxaya waxa dhici doona marka aad taabanayso ama aad dhaqaajinayso ("sanka ayaan kaa tirtirayaa"), isticmaal magacyada carruurta, u jeedso iyaga marka aad hadlayso.

- Waxay sameeyaa jadwal joogto ah oo la saadaalin karo, filashooyin iyo is dhexgal loogu talagalay oo lala samaynayo carruurta iyaga oo dabacsanaanaya.
- Waxay baraan carruurta waxa uu yahay habdhaqanka la aqbali karo. Tusaale ahaan, in ay baraan carruurta "Cagahaaga ku hay dhulka", "Isticmaal codka gudaha dhismaha".
- Waxay sameeyaan jawiga waxbarashada hore oo soo dhawayn leh oo wata farriin togan ee ka mid ahaanshaha iyo kala duwanaanshaha dadka.
- Waxay ku soo daraan meel ammaan ah, oo raaxo leh oo loogu talagalay carruurta si ay uga nastaan kuwa kale ama ku bartaan xeeladaha isdejin.
- Waxay baraan "akhrinta shucuurta" ("emotional literacy")
    - Waxay tusaaleeyaan sida loo maamulo shucuurta, waxay tusaaleeyaan ka hadalka dareenka, waxay ogaysoonaadaan oo aqoonsadaan dareenka, waxay u isticmaalaan taageero muuqaal ah si ay u aqoonsadaan dareennadooda iyo dareenada dadka kale.
    - Waxay tusaaleeyaan dareenka oo ay bixiyaan fursadaha lagu celceliyo dareenka naxariista.
    - Waxay ka caawiyaan carruurta inay dabeecadda ku xiriiriyaan dareenka oo waxayna siiyaan calaamadaynta dareenka "Waxaan iswaydiinayaa in aad saaxiibkaa ku dhufatay sababta oo ah waad cabsatay markii uu kugu qayliyey?"(MACMH, in press).
    - Waxay aqoonsadaan oo dhiirigeliyaan dadaalka carruurta ee in ay calaamadiyaan oo xakameeyaan shucuurta.
- Waxay jadwalka hawl maalmeedka ku soo daraan xeeladaha baridda, tusaalaynta, iyo ku celcelinta ismaamulka naftaada, sida xeeladaha isdejinta, neefsashada qoto dheer, is ogaanshaha naftaada, ama yoga inta lagu jiro wakhtiga goobada, kala beddelka, ama jimicsiyada jirka ama wadaaga midba qofku jeerkiisa qaato inta lagu jiro howsha farshaxanka.
- Waxay bixiyaan xasuusin muuqaal ah oo is-xakamaynta iyo muujinta shucuurta carruurta ah si ay iskood ugu isticmaalaan.

## *Marka ay barayaashu naqshadaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay bixiyaan fursadaha horumarinta xirfadeed ee dhammaan shaqaalaha barnaamijka si ay u bartaan welwelka iyo dhaawaca masiibada ee carruurta yaryar iyo sidoo kale xeeladaha loogu caawiyo carruurta inay guuleystaan.
- Waxay adeegsadaan khayraadka gobolka iyo kuwa maxalliga ah ee loogu talagalay shaqaalaha barnaamijka iyo qoysaska sida Agabka Qalabka Ka Warqaba Dhaawaca Masiibada ee ka ymid Ururka Caafimaadka dhimirka ee Caruurnimada Hore ee Minnesota (Minnesota Association of Childhood Mental Health.)
    - Qalabka Ka Warqaba Dhaawaca Masiibada: www.macmh.org/toolkit.

**Fikrad Muhiim ah:** Cilaaqaadka labadaba waxaa saameeya dhaawaca masiibada waxayna ka celin karaan carruurta saameynta dhaawaca masiibada. Cilaaqaadka muhiimka u ah nolosha caruurtu waxay la jiraan qoysaska iyo bixiyayaasha daryeelka.

### *Si ay u bixiyaan daryeel iyo waxbarasho tayo leh, barayaashu:*

- Dhallaanka, barayaashu waxay ogsoonaadaan oo uga jawaabaan siyaabo wakhtiga ku habboon si ilmuhu u dareemo dareen ammaan iyo ka mid ahaansho. Dadka waaweyni waxay ogaadaan oo ay taageeraan sida dhallaanku u bilaabaan inay is dejiyaan, iyagoo isticmaalaya hab-raacyo iyo deegaan xasilloon.
- Waxay aqoonsanyihiin doorka shakhsiga iyo awooda qoyska ee kor u qaadida adkaysiga marka ay wajahaan waayo-aragnimada caruurnimo ee xun oo ay u qasdaan magacaabista awoodaha qoyska.
- Waxay fahamsanyhihiin in daryeelayaashu ay si fiican u daryeelaan kuwa kale marka ay iyagu naftooda daryeelayaan.
- Waxay ogsoonyihiin saamaynta dhaawaca masiibada ee la isu gudbiyo ay ku leedaday barayaasha caruurnimada hore oo ay garanayaan calaamadaha dhaawaca masiibada la isu gudbiyo (sida ka daalitaanka, rajo la'aanta, hurdo la'aanta, daalka, iyo kuwo kale).
- Waxay iska hubiyaan fikradahooda iyo shucuurtooda kahor inta ayna wax falin ama ka falcelin.
- Waxay aqoonsanyihiin astaamaha iyo calaamadaha dhaawaca masiibada ee ardayda, macalimiinta iyo shaqaalaha.
- Waxay fiiro gaar ah u yeeshaan tilmaamaha ay carruurtu bixinayaan oo ay si joogto ah ugaga jawaabaan qaddarka saxda ah ee taageerada.
- Waxay ogyihiin taageerada loogu talagalay qoysaska ay saamaysay dhaawaca masiibadu.
- Waxay baraan carruurta inay is dejiyaan ama waxay siiyaan wakhti dheeraad ah carruurta u baahan xiriirka. Waxay bixiyaan taageerada carruurta iyaga oo jir ahaan u dhowaanaya.
- Waxay fahamsanyihiin muhiimadda xiriirka togan ee qoysasku uu u leeyahay carruurta yaryar.
- Waxay qiraan waxyaabaha walbahaarka ku haya waalidka iyo heerarka walbahaarka.

### *Marka ay barayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Waxay tusaaleeyaan oo baraan qaadashada nasashada si ay u dejiyaan oo ay carruurta u sharaxaan habka, iyaga oo fiiro gaar ah u leh calaamadaha muujinaya in carruurtu ay u baahan yihiin wakhti dheeri ah, isku xirnaan, iyo isku soo dhawaansho jir ahaneed.
- U ogolaadaan carruurta (iyo qoysaska) wakhti hore inay sii ogaadaan wixii ku saabsan kala beddelka iyo khibradaha cusub.
- Waxay ku dhaqmaan dhaqamada is-daryeelka shaqsiyeed.
- Xaaladaha marka ay carruur joogto meesha, marka hore way is dejiyaan, u fiirsadaan, dib u milicsadaan oo iswaydiiyaan, "Maxay dabeecadu ii sheegaysaa? Maxaan samayn karaa si aan u joogo oo aan xiriir ula yeesho ilmaha? (MACMH, in press).
- Waxay tusaaleeyaan isla falgalka iyo xiriirka togan ee dhammaan dadka waaweyn iyo carruurta.
- Waxay siiyaan fursadaha xiriirka carruurta dhexdeeda iyo dadka waaweyn; waxay baraan xirfadaha is dhexgalka

asxaabta, sida lammaanaynta iyo wadaaga, markaaga hadalka ama markayga, markaaga.

- Waxay la kaashadaan oo ka taageer waalidiinta guusha carruurta; waxay la samaystaan xiriir ixtiraam iyo kalsooni leh waalidiinta, iyaga oo ka qayb galinaya qoyska go'aan qaadashada iskaashiga leh.
- Waxay kaa faa'iidaystaan, u gudbiyaan oo ku xiraan waalidiinta khayraadka deegaanka iyo gobolka si ay u helaan taageero.
- Waxay ku daraan digniino loogu talagalay kala guurka iyo khibradaha cusub.
- Waxay isticmaalaan hadal iyo erayo isbarbar socda oo sharxaya waxa dhacayaa marka ay ku dhacaan carruurta "Waxaan kaa caawinayaa inaan sanka ka masaxo."
- Kala hadlaan badbaadada oo isticmaalaan muuqaallo si aad uga caawiso carruurta inay ogaadaan waxa aad ula jeedo, "Shaqadaydu waa inaan ammaankaaga ilaaliyo markaa waxaan kuugu caawinayaa inaad cagahaaga dib ugu soo celiso dhulka" (MACMH, in press).

### *Marka ay barayaashu naqshadaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay ku soo daraaan dhaqanka qoysaska goobta, fahamka in aqoonsashada awoodaha dhaqameed ay taageeri karto ka bogsashada dhaawaca masiibada.
- Waxay shaqaalaha ku tababaraan hababka cayiman ee daawaynta dhaawaca masiibada.
- Waxay hubiyaan in lagu soo daro dhaqanka qoyska shaqada daryeelka caruurnimada hore iyo goobaha waxbarashada, fahamku waa aqoonsiga iyo ku soo darida awoodaha dhaqameed in ay taageeri karaan ka bogsashada dhaawaca masiibada.
- Waxay siiyaan shaqaalaha fursadaha horumarinta xirfadeed ee la xiriira is-daryeelka nafeed sida tababarka ogaanshaha naftaada.
- Waxay hagaajiyaan culayska shaqada hadba sida loogu baahdo, waxayna dhaqangeliyaan habka wada shaqaynta ee dib u milicsiga waayo-aragnimada, fikradaha iyo dareenka la xiriira welwelka iyo dhaawaca masiibada fasalka dhexdiisa.

### *Sheekooyin ka yimid goobta:*

*Viviana waxay la timaaddaa xarunta daryeelka carruurta iyada oo wadata xayawaanka cufan ee ay ugu jeceshahay. Molly ayaa waxay ku salaamaysaa "Buenos dias Viviana. Como estas?". Viviana waxay si degan ugu jawaabtay Isbaanish "Buenos dias." Molly ayaa waxay qabatay gacanta oo u kaxaysay dhanka koox yar oo caruur ah waxana ay ka caawisay gelida ciyaarta. Waxay aqoonsan tahay baahida ay Viviana u qabto inay ku haysato xayawaankeeda cufan fasalka dhexdiisa. Molly way sii agjoogtay waxayna qayb ka tahay wada hadalka iyo isdhexgalka. Waxay ogtahay in tani ay muhiim tahay iyada oo ka shaqaynaysa inay dhisto xiriir sugan oo ay la yeelato Viviana oo dhawaan laga soo korsaday Costa Rica oo hadda joogta Minnesota guri cusub, qoys cusub, daryeel carruur cusub oo ay ku hareeraysan tahay luqad cusub*



2020

# Qaybta uu Ka Kooban Yahay X: **La shaqaynta caruurta aan gaarin da'da iskuulka iyo qoysaskooda ee ku Hadla Luuqadaha Badan**

Baruhu waxa uu tixgaliyaa caqiidada shaqsiyadeed ee ku saabsan luqadda iyo dhaqanka waxana uu dhisaa xirfado si uu kor ugu qaado deegaan awooda qofku waxa uu ku xooganyahay ku salaysan, jawi luqadda diirada la saarayo oo loogu talagalay carruurta waxayna dhisaan xeeladaha ka qaybgalinta qoyska.

**Fikrad Muhiim ah:** Wadashaqayn dhex marta dhammaan dadka waaweyn ee la falgalaya Bartayaasha Luqadaha Badan (MLL) ayaa lagama maarmaan u ah si loo taageero horumarinta luqadda.

### *Si ay u bixiyaan daryeel iyo waxbarasho tayo leh, barayaashu:*

- Waxay fiiro gaar ah u yeeshaan xiisaha carruurta oo ay kala hadlaan (qoysaska iyo asxaabta shaqada) siyaabaha lagu dhisayo waxyaabaha ay jecelyihiin si loo taageero isdhexgalka asaagga iyo wada hadalka inta lagu jiro howlaha caadiga ah iyo ciyaaraha.
- Waxay sahamiyaan waxa ay iyagu aaminsanyihiin ee ku saabsan dhaqanka iyo luqadda ee la mid ah, ama ka duwan qofka tiisa, si meesha looga saaro eexda ka hortagaysa iskaashiga iyo koox ula shaqaynta dadka kale.
- Waxay wax ka bartaan muhiimada wada shaqaynta ka dhaxaysa shaqaalaha, qoysaska, maamulayaasha iyo xirfadlayaasha kale si ay ugu faa'iideeyaan ardayda iyo qoysaska ku hadla luqadaha badan.
- Waxay ku soo dhoweeyaan carruurta iyo qoysaska Ingiriisi iyo afkooda hooyo haddii ay suurtogal tahay.
- Waxay u fiirsadaan waxa carruurta ku mashquuliya in ay wax bartaan. Waxay la wadaagaan macluumaadka oo ay fikir aruurin ku sameeyaan sida looga faa'iidaysan karo ka qaybgalka.

### *Marka ay barayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Waxay dhiiri geliyaan kalsoonida oo ay fidi ku casumaadaha si ay qoysasku u bilaabaan una soo jeediyaan waxqabadyada taageeraya luqadda guud ee carruurtooda. Tusaale ahaan, kala shaqee qoysaska si loo horumariyo yoolalka luqadda ee luqadda guriga iyo horumarinta Ingiriisiga goobta carruurnimada hore (haddii ay tahay meel Ingiriisi lagaga hadlo); Qoysasku waxa ay wadaagi karaan waxa ay filayaan iyo waxa ay ilmahoodu ku maqlaan afkooda hooyo iyo marka ay bartaan Ingiriisiga.
  - Waxay xasuusanyihiin, in sannadaha 0-3, tixgelinta muhiimka ahi ay ku saabsan tahay sida carruurtu u wada xiriiraan oo ay u bartaan luqad, ee ayna ahayn midda ay tahay luqadda lagu hadlo.

- Waxay ku martiqaadaan qoysaska inay la wadaagaan sheeko ku qoran luqadooda hooyo
- Waxay ka bartaan wax ku saabsan xoogga dhaqamada kala duwan ee qoyska iyo luqadaha foomamka diiwaangelinta iyo shirarka soo dhaweynta ama iyada oo qayb ka mida ah xeerarka barnaamijka.
- Waxay isticmaalaan xeeladaha sida wada sheekaysiga, booqashooyinka guriga, shirarka, munaasabadaha qoyska iyo shirarka si aad u dhisaan hababka xiriirka ee u shaqeeya shakhsiyaadka iyo kooxaha.
- Waxay sameeyaan iskaashi iyo fursado loogu talagalay qoysaska si ay gacan u caawiyaan go'aannada ku saabsan horumarka iyo waxbarashada guud ee carruurtooda (Tusaale: la shaqee qoysaska si loo abuuro hadafyada luqadda ee luqadda guriga iyo dhisidda Ingiriisiga).
- Waxay bixiyaan jawi soo dhawayn leh oo laga wada tirsanyahay oo ka tarjumaya carruurta, qoysaska, dhaqamada iyo luqadaha barnaamijka ku jirta.
- Waxay ku daraan qoysaska manhajka iyo waxqabadyada laga yaabo inay ku jiraan barnaamijka carruurnimada hore ama guriga. Tusaale ahaan, waxay sameeyaan buuga fasalka ee qoysaska kaas oo lagu wadaagi karo guriga ama iskuulka, waxay ku martiqaadaan qoysaska inay la wadaagaan sheeko ku qoran luqadooda hooyo.

## *Marka ay barayaashu naqshadaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay bixiyaan fursado loogu talagalay qoysaska in ay ku wadaagaan khibradooda luqadda ee guriga iyo goobta daryeelka carruurta qoyska labadaba.
- Waxay la kaashadaan hay'adaha bulshada iyo barnaamijyada (ay ku jiraan maktabadaha) si loo bixiyo agabka iyo isku xirka qoysaska. Waxay raadiyaan agab ay u isticmaali karaan barnaamijka, sidoo kale, sida
  - Buugaag iyo cajalado ka tarjumaya luqadaha carruurta ku jirta barnaamijka.
  - Sawirro u eg carruurta iyo qoysaska.
  - Sawirro, agabyo, cuntooyin, iyo hawlo joogto ah oo dhaqan ahaan la garanayo.
- Waxay hubiyaan in wakhti loo qoondeeyay iskaashiga.
- Waxay siiyaan waxbarasho xirfadeed barayaasha, shaqaalaha iyo qoysaska oo diiradda saaraysa wacyiga dhaqanka, ka jawaab celinta, mas'uuliyadda iyo luqadda.
- Waxay qalab iyo agab siisaa shaqaalaha barnaamijka sida Luuqadaha badan ee Waaxda Waxbarashada Minnesota Minnesota Department of Education Multilingual) Bogga Bartayaasha: https://education.mn.gov/MDE/dse/early/highqualel/multiling/index.htm.
- Waxay bixiyaan agab isdiiwaangelinta oo ku qoran luqadaha ka turjumaya bulshada. Wakhtiyada isdiiwaangelinta muhiimka ah, waxay hubiyaan in taageerada luqadda ay heli karaan qoysaska ka socda dadka ku hadla luqadaha badan.

**Fikrad Muhiim ah:** Ururinta iyo adeegsiga macluumaadka ku saabsan dhaqanka iyo luqadda Bartayaasha Luqadaha Badan (MLL) ayaa fure u ah bixinta manhaj ku habboon korriinka iyo dhaqanka iyo barnaamijyada loogu talagalay carruurta iyo qoysaska.

*Si ay u bixiyaan daryeel iyo waxbarasho tayo leh, barayaashu:*

- Waxay u fiirsadaan luqadaha iyo xirrirka aan hadalka ahayn ee ay adeegsadaan carruurtu marka ay ciyaarayaan, isla-hadalka naftooda, iyo wakhtiyada kale ee maalintii. Sidee ayey u isticmaalaan luqada? Luuqaddee/luuqadahee ayay isticmaalaan? Yey la isticmaalaan?
- Waxay u fiirsadaan Bartayaasha Luqadaha Badan (MLL) iyo jawaabahooda luqadda, tilmaamaha aan hadalka ahayn iyo sida ay u muujiyaan fahamka luqadda. Maxaa taageerooyin dheeraad ah oo loo baahan karaa?
- Waxay u fiirsadaan isticmaalka luqadda sheegashada/muujinta. Sidee ayaad u taageeri kartaa oo aad u dhisi kartaa luqadda? Fikir heer sareeya?

*Marka ay barayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Waxay bixiyaan fursado loogu talagalay carruurta in ay ku bartaan dhaqamada, caadooyinka, luqadaha, iyo qaab dhismeedka qoyska ee carruurta iyo qoysaska ku sugan goobtooda dhallaanka iyo socod-baradka iyo bulsho weyntaba. Tusaale ahaan, ciyaarista, buug-akhrinta, iyo sahaminta bulshada (sida u lugaynta jardiinooyinka) ayaa waxay ka caawiyaan carruurta inay isbartaan midba midka kale iyo bulshadooda.
- Waxay ku soo daraan buugaag luqad ahaan iyo dhaqan ahaanba kala duwan iyo agabyo kale goobta carruurnimada hore.
- Waxay ku soo daraan macluumaad laga soo ururiyay MLL iyo qoysaska marka la qorsheynayo waayo-aragnimada barashada iyo deegaanka. Waxay weydiiyaan su'aalo ku saabsan sida carruurtu ugu isticmaalaan luqadda guriga. Xirfado noocee ah ayay qoysasku ku arkaan deegaankooda guriaga?
- Waxay ugu soo daraan ereyada ama odhaahyada muhiimka ee luuqadaha guriga ee carruurta siyaabo macno leh maalintii oo dhan.
- Waxay isticmaalaan taageerada luqadda maalintii oo dhan si ay u taageeraan dhammaan waxbarashada carruurta (jadwallada sawirada, kaararka calaamadaynta, heesaha, midaaritaan, waxyaabaha ciyaarta ah ama waxyaabaha dhabta ah).
- Waxay Isku-dubaridaan waxqabadyo kooxo tiro yar si loo siiyo fursado ay carruurtu kula isticmaalaan luqadda facooda iyo dadka waaweyn. Tusaale ahaan, isu soo jeedi kuraasta dhallaanka marka aad wax cunayaan. Ku martiqaad saaxiibada socod baradka ah meesha buugtaa marka aad wax u akhrinayso hal ama laba caruur ah. Ku dhiiri geli dhallaanka waaweyn inay bartaan xiriir/hadaaqa hallaanka yaryar ("Fiiri! Wuu dhoola cadeynaya sababtoo ah waxaad tustay sawaxanka/dawanka. Wuu jecelyahay marka aad wax tusto.").
- Waxay ku daraan carruurta samaynta derbi kelmado ah ama in ay ku calaamadiyaan walxaha fasalka dhexdiisa ah luqado badan.

### *Marka ay barayaashu naqshadaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay siiyaan wakhti loogu talagalay u fuursado.
- Waxay qiimeeyaan habdhaqanka barnaamijka/fasalka ee taageeraya hawlaha iyo isticmaalka luuqada ee ku haboon koriinka iyo dhaqaka. Waxay isticmaalaan diiwaangelin iyo qiimayn jadwal joogto ah oo ku salaysan si ay u horumariyaan isdhexgalka iyo deegaanka.
- Waxay si joogto ah u soo ururiyaan ama ugala kulmaan qoysaska waxa ku saabsan danaha carruurta iyo xooga qoyska iyo waxyaabahooda wanaagsan.
- Waxay sameeyaan hoggaan qoyska ama koox la-talin qoysaska ah si ay u wada abuuraan xeerarka barnaamijka iyo hab-dhaqanka ama la talinta qoysaska soo gelaya.

## **Fikrad Muhiim ah:** Habka ku salaysan waxa qofku ku xoog/awood badanyahay ayaa kor u qaadaysa horumarinta luqadda iyo barashada ee loogu talagalay Bartayaasha Luqadaha Badan (MLL) iyo dhammaan carruurta.

### *Si ay u bixiyaan daryeel iyo waxbarasho tayo leh, barayaashu:*

- Waxay dhiiri geliyaan isticmaalka waalidka ee luqadda guriga iyo sida ay u kobciso oo u qoto dheerayso xirfadaha luqadda ee ilmahooda.
- Waxay sameeyaan wacyiga ku saabsan male-awaalahooda dhaqameed iyo eexda ku saabsan luqadda (ay ku jiraan luqado cayiman, lahjada, lahjada hadalka, naxwaha) si ay u aqoonsadaan marka malo-awaaladaasi ay keeni karaan faham la'aan, dhibaatooyin, ama isku dhac.
- Waxay u fiirsadaan xirfadaha iyo khayraadka/agabka carruurta iyo qoysaska.
- Waxay cilmi baaris ku sameeyaan oo ku soo daraan ereyada, heesaha iyo faro ciyaarka lagu isticmaalo luqadaha guriga ee carruurta joogta goobtooda,
- Waxay ku martiqaadaan carruurta iyo qoysaska in ay baraan ereyada muhiimka ah, odhaahyada, ku tirinta afkooda hooyo.
- Waxay ogsoonyihiin isticmaalka luqadda iyo dhaqanka ee deegaanka carruurnimada hore. Luqadahee ayey carruurtu isticmaalaan? Sidee ayey luqada ugu isticmaalaan siyaabo macno leh?

### *Marka ay barayaasha u sii korodho aqoonta, xirfadaha iyo kartidu, waxay:*

- Waxay taageeraan horumarinta luqadda carruurta aadka u yaryar, ee aan weli aqoonin erayo luqad kasta. Waxay u fiirsadaan hab-dhaqanka carruurta iyo xiriirka aan hadalka ahayn (dhoola caddaynta, cago laadka, iwm.), iyo isku dayga wada xiriirka (oo ay ku jirto oohin—"Alla, ma jeclid miyaa taas? Haye, waxaan raadin karnaa boombalo kale") oo ay calaamadeeyaan wada hadalka/xiriirkooda. Deegaannada qaniga ku ah luqadda ee luqad uun ayaa waxay taageeraan horumarinta luqadda ee dhammaan luqadaha.
- Waxay qiimo u yeelaan faa'iidooyinka ee qoysaska isticmaala afkooda hooyo. Cilmi baaristu waxay soo jeedinaysaa in waalidiin badani ay jeclaan lahaayeen in carruurtoodu bartaan oo ay isticmaalaan luqadahooda si ay u horumariyaan aqoonsigooda dhaqameed oo ay u ilaaliyaan xiriirka ay la leeyihiin qoyskooda iyo bulshadooda (Zheng et. al., 2021).
- Waxay ku martiqaadaan qoysaska inay la wadaagaan xiisahooda, xirfadahooda, kartidooda, caadooyinkooda carruurta fasalka/goobta.

- Waxay hawlaha waxbarashada ku soo daraan xiisaha iyo waaya-aragnimada carruurta. Waxay carruurta u ogolaadaan in ay noqdaan “khabiirka” oo ha hogaamiyaan waxbarashada.
- Waxay siiyaan qoysaska macluumaadka ku saabsan mowduuca, waxay ku martiqaadaan qoysaska inay wadaagaan macluumaadka bulshadooda, dhaqanka guriga, iyo waayo-aragnimada taageeraya barashada mowduuca.

### *Marka ay barayaashu naqshadaynayaan oo ay hoggaamiyaan, waxay:*

- Waxay ku soo daraan in ay ka bartaan wax ku saabsan awooda dhaqamada kala duwan ee qoyska iyo luqadaha foomamka diiwaangelinta iyo shirarka soo dhaweynta ama iyada oo qayb ka mida ah xeerarka barnaamijka.
- Waxay u qorsheeyaan horumarinta xirfadeed ee faa’iidooyinka horumarinta luqadaha badan ee barayaasha hore ama qoysaska.
- Waxay aqoonsadaan siyaabaha dhammaan ECE iyo shaqaaluhu ay u isticmaali karaan xeelado lagu dhiirigeliyo isticmaalka luqadda guriga maalintii oo dhan.
- Waxay buug-yaraha barnaamijka iyo wargeysyada ku soo daraan macluumaadka ku saabsan faa’iidooyinka barashada MLL.

### *Sheekooyin ka yimid goobta:*



*Howard waxa uu ku jiray daryeelkayga caruurta sanado ka hor. Howard iyo qoyskiisu waxay ku hadli jireen Shiinays. Awowgii ayaa maalin kasta u soo lugaysiin jiray daryeelka carruurta wuxuuna inta badan istaagi jiray oo daawan jiray carruurta aan gaarin xilliga ay ku ciyaarayaan goobta ciyaarta. Howard inta badan waxa uu samayn jiray dhaqan kaas la mid ah. Hal jilib ayuu ku jilba joogsan jiray oo u daawan jiray carruurta oo ku ciyaaraysa gudaha iyo dibaddaba. Mar mar dhif ah ayuu kor eegi jiray. Muusan la hadli jirin caruurta kale ama aniga, laakiin mararka qaarkood wuxuu ku midaari jiray ama ruxi jiray madaxa. Marar dhif ah, wuu ordi jiray, la ciyaari jiray oo uu u dhoola caddayn jiray carruurta kale. Marka aan dib u milicsado, waxaan ka fikirayaa dhammaan waxyaalihii aan bartay, ee aan hadda sameeyo, kuwaas oo ka caawin lahaa Howard iyo qoyskiisa inay dareemaan soo dhawayn iyo inay guuleystaan.*

*Hadda, markaan ay isdiiwaangeliyaan waxaan baran lahaa dhawr kelmadood oo muhiim ah, weedho iyo salaanta Shiinaha si aan u caawiyo Howard iyo awoowgiis inay dareemaan soo dhowayn. Waxaan goobta ku soo dari lahaa sawirada qoyskiisa oo waxaan soo heli lahaa buugaag iyo daabaaado Shiinays ah. Waxaan si joogta ah ula xiriiri lahaa waalidkiis si aan wax uga barto waxa Howard xiiseeyo oo aan ku soo dari lahaa waxyaabaha uu jecel yahay manhajka ama deegaanka. Waxaan sidoo kale aqoonsan lahaa in indha-indheynta Howard ee isaga oo ka fog uu fiirsanayo ay muhiim u tahay barashada luqadda oo carruurtu inta badan waxay baranayaan luqadda inta ay ku jiraan “muddadan aamusnaanta”. Waxaan ku soo dari lahaa*

*jadwal sawireed iyo qalab kale oo muuqaal ahaan ah si aan uga caawiyo xiriirka Howard maadaama oo uu ku shaqaynayo wax ka badan hal luqad. Waxaan ku lamaanayn lahaa asxaabtiisa si aan u xaqiijiyo in uu helo fursado uu ku barto luqada isaga oo ku jira goobaha kooxo yar. Waxaa jira khayraad kale oo aad u badan oo hadda diyaar u ah barayaasha carruurnimada hore si ay u horumariyaan la dhaqankooda bartayaasha ku hadla luqadaha badan iyo qoysaskooda - wax badan oo la barto maalin kasta!*

# Ma rabtaa in aad wax dheeraada ka barato?

Ilahaan dheeraadka ah waxay kaa caawinayaan barasha dheeraada oo ku saabsan daryeelka iyo barbaarinta caruurta kurayada:

Xaruunta Illaha Ganacsiga ee Bixiyeyaasha Qoyska (Business Resource Center for Family Providers)
(http://www.firstchildrensfinance.org/businessresourcecenter/family-2)

*Xanaanaynta Caruurteena: Xeerarka Waxqabadka Hagaya Qaranka Caafimadka iyo Amaanka ee Xanaanayta Hore iyo Barnaamijyada Waxbarashada (Caring for Our children: National Health and Safety Performance Standards Guidelines for Early Care and Education Programs)*, Daabaciisa Saddexaad. (2011)

Xaruunta Horumarinta Cunuga ee Jaamacada Harvard (Center on the Developing Child at Harvard University)
(http://developingchild.harvard.edu)

Xarunta Waxbarashada Hore iyo Horumarita (Center for Early Education and Development)
(http://www.cehd.umn.edu/CEED/)

Xarunta Waxbarashada Hore iyo Horumarita (Center for Early Education and Development). Su'aalo ku saabsan Caruurta. St. Paul: Center for Early Education and Development (http://www.cehd.umn.edu/CEED/publications/questionsaboutkids/default.html)

Xarunta Waxbarashada Hore iyo Koritaanka (Center for Early Education and Development). Warqadaha Talooyinka (Tip Sheets). St. Paul: Center for Early Education and Development (http://www.cehd.umn.edu/CEED/publications/tipsheets/default.html)

Cutubka 9503 ee Xaruunta Liisanka ee Xanaanaynta Cunuga (Chapter 9502 Licensing of Day Care Facilities). (2007). *Sharciyada Maamulka ee Minnesota Cutubka 9502 (Minnesota Administrative Rule Chapter 9502)*. State of Minnesota: Office of Revisor of Statutes. (https://www.revisor.mn.gov/rules/?id=9502&version=2014-01-18T09:55:51-06:00&format=pdf)

Copeland, T. (2004). *Hagaha Sharciga iyo Caymiska Xanaanada Cunuga (Family Child Care Legal and Insurance Guide). St Paul:* Redleaf Press.

Copeland, T. (2006). *Heshiisyada iyo Siyaasada Xanaanada Cunuga (Family Child Care Contracts and Policies).* St Paul: Redleaf Press.

Copeland, T. (2009). *Hawlgabka iyo Maamulitaanka Lacagta ee Xanaanada Cunuga (Family Child Care Money Management and Retirement Guide).* St Paul: Redleaf Press.

Copeland, T. (2012). *Family Child Care Marketing Guide.* St Paul: Redleaf Press.

Xaruunta Waxbarshada Hore iyo Aqoonta Caruurnimada (Early Childhood Learning and Knowledge Center
(http://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/hslc)

Waxbarashada Hore: Sida Aad Caruurtaada Ugu Bilaabi Lahayd Bilow Caafimaad Leh (Early Education: Getting your Children Off to a Healthy Start)
(http://www.health.state.mn.us/divs/hpcd/chp/cdrr/earlychildhood/index.html)

*Buuga Cudurada Faafa goobaha Xanaanynta Cunugga (Infectious Diseases in Child Care Settings and Schools Manual)*. (2008). Hennepin County. (http://www.hennepin.us/residents/health-medical/infectious-diseases)

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Education). (2005). *Tilmaamaha Horumarka ee Caruurnimada Hore: Xeerarka Waxbarasha Hore ee Minnesota (Early Childhood Indicators of Progress:* Minnesota's Early Learning Standards). St. Paul: Minnesota Department of Education. (http://education.state.mn.us/MDE/StuSuc/EarlyLearn/index.html)

Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Education). (2013). *Xeerarka Hagaya Waalidka Waxbarshada Hore ee Minnesota (Parent Guides for Minnesota Early Learning Standards)*. St. Paul: Minnesota Department of Education. (http://education.state.mn.us/MDE/JustParent/EarlyLearnKReadi/index.html)

Ururka Qaranka ee Tacliinta Caruurta Yar (National Association for the Education of Young Children) (http://www.naeyc.org/)

Ururka Waxbarashda Qaranka ee Caruurta Kuraya (National Association for the Education of Young Children). (2005 Code, Waxay Xaqiijiyeen iyo Cusboonaysiiyeen 2011). Xeerka Ku Dhaqanka ee NAEYC (NAEYC Code of Ethical Conduct). Washington, D.C.: National Association for the Education of Young Children.

Ururka Qarameed ee Xanaanada Cunuga (National Association for Family Child Care) (http://www.nafcc.org)

Xaruunta Qaranka ee Dhaqanka iyo Jawaabida Luqadda (National Center on Cultural and Linguistic Responsiveness) (http://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/hslc/ttasystem/cultural-linguistic)

Xaruunta Qaranka Khayraadka Caafimaadka iyo Ammaanka ee Xanaanaynta Hore iyo Waxbarshada Hore (The National Resource Center for Health and Safety in Early Child Care and Early Education) (http://nrckids.org)

Eber ilaa Saddex (Zero to Three) (http://zerotothree.org)

MINNESOTA